
HERITAGE INSTITUTE

# Caqabadaha

## hortaagan dawlad wanaagga Soomaaliya



Maarso 2021

Copyright © 2021 | The Heritage Institute for Policy Studies, All Rights Reserved.

Abdirizak A. Muhumed is the lead author of the study.

Readers are encouraged to reproduce material for their own publications, as long as they are not being sold commercially. As copyright holder, the Heritage Institute for Policy Studies requests due acknowledgement and a copy of the publication. For online use, we ask readers to link to the original resource on the HIPS website.

**© Heritage Institute for Policy Studies 2021.**

# Tusmada Daraasadda

**1. Nuxurka Daraasadda** 4

**2. Hordhac** 5

**3. Habraaca Daraasadda** 7

**4. Dibu eegista daraasadaha** 7

**5. Geeddi-socodka Dowladnimada Soomaaliya** 10

**6. Caqabadaha hortaagan dawlad wanaagga** 12

6.1. Tixgalin la'aanta ku dhaqanka sharciga 12
6.2. Xasilooni darrada siyaasadda 17
6.3. Isla xisaabtan la'aanta 21
6.4. Hufnaan yaraanta iyo baahsanaanta musuqmaasuqa 23
6.5. Musuqmaasuqa Baahsan 25
6.6. Waxtarka Dowladda 27

**7. Gunaanad** 31

**8. Talobixin/tixgalin siyaasadeed** 32

# 1. Nuxurka Daraasadda

Soomaaliya waxa ay aad ugu liidataa oo ay ka gaabisay astaamaha aasaaska u ah ku dhaqanka dawlad wanaagga, kuwaas oo kala ah, ku dhaqanka sharciga, waxtarka dawladda, xasiloonida siyaasadda, buuxinta kaalinta bulshada, isla xisaabtanka, hufnaanta, iyo xakamaynta musuqmaasuqa. Marka loo eego xaaladda siyaasadeed, wada shaqaynta foolaadka (haldor) siyaasadda ayaa mar walba burbura oo dawladda fadderaalka Soomaaliya iyo dawladaha xubnaha ka ah fadderaalka ayaa khilaafkoodu cirka isku sii shareeraa.[1]

Qabyada ku jirta dastuurka kumeelgaarka ah ayaa uga sii darta xasilooni darrada siyaasadda Soomaaliya. Waxaan tixgalin la siinin talooyinka dadweynaha iyo ka qaybgalka bulshada ee ku salaysan sida dalka loo xukumayo. Baahida loo qabo bixinta adeegyada bulshada iyo waxqabadka hay'adaha ayaa si isku mid ah u xaddidan. Sida lagu xuso warbiximaha isdaba jooga ah ee hay'adaha u dooda xuquuqda wartabiyeyaasha (suxufiyiinta), warbaahinta ka hawl gasha dalka Soomaaliya"Xor Ma aha" taas oo micnaheedu yahay in ay xukuumaddu dhaqdhaqaaqa warbaahinta xakamayso. Foolaadka xukuumaddu waxay ka cagajiidaan in ay aqbalaan talooyinka bulshada rayidka ah, sababta oo ah bulshada rayidka ah lafteeda ayaa kala daadsan. Sida oo kale waxa meesha ka maqan hay'adaha dowliga ah ee daneeya in la weeleeyo ama la hirgeliyo baaqyada ku salaysan dibuhabeynta hay'adaha dawladda iyo ku dhaqanka shiruucda dalka.

Waxa aan wax la la yaabo ahayn, in ay Soomaaliya tahay mid ka mid ah dalalka dunida ugu hufnaanta yar, uguna musuqmaasuqa badan, taas oo sii wiiqday kalsoonida dadweynaha. Inta badan arrimaha ugu mihiimsani, waa in loollanka joogtada ahi uu wax ka beddelay ku dhaqanka sharciga, isqabqabsiga siyaasadda ee soo ifbaxay ayaa muujinaya ka xuubsiibashada dastuurka iyo xayndaabka sharciga.

Rabitaan la'aanta siyaasiyiinta qaranka iyo ka cagajiidka in ay dhisaan, lana shaqeeyaan hay'adaha dowliga ah ee shaqeynaya, oo ay weheliso qaacidada siyaasiga ah ee 4.5 ayaa ayaa curyaamisay dawlad wanaagga. Daraasaddan ayaa looga golleeyahay in lagu qiimeeyo caqabadaha hortaagan dawlad wanaagga Soomaaliya, iyada oo si gaar ah isha loogu hayo dowladda federaalka ah ee beesha caalamku siineysay taageero dhaqaale iyo mid siyaasadeed muddo ku siman 20 sano.

1 http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2020/01/HIPS_2020-SOS-2019-Report-English- Version.pdf

# 2. Hordhac

Tan iyo markii dib loo yagleelay qarannimadii Soomaaliya sannadkii 2000, dalku horumar aad u kooban ayuu ka sameeyay dawlad wanaagga. Marka loo eego ku dhaqanka sharciga, dastuurka kumeelgaarka ah waxa loo arkaa in uu qabyo yahay oo ay ku jiraan 15 qodob oo isdabraya[2] laguna muran sanyahay. Maxkamadda dastuurka, ayaa looga fadhiyaa in ay dib u eegis ku sameyso xeerarka qabyada ah, si ay u go'aamiso sharcinimada xeerarka uu meelmariyey golaha shacabka fadderaalku, iyada ayaana leh masuuliyadda xallinta khilaafaadka siyaasadeed ee u dhaxeeya dawladda fadderaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah. Sidoo kale hay'adaha dowladda fadderaalka ayaa ah kuwo qabyo ah oo aan weli la dhisin.

> *Waa muhiim in Soomaaliya kor looga soo qaado meeshii ay joogtay sannadihii ku suntanaa dibu dhaca iyo rajo beelka. Maxaa yeelay boqolkiiba 80 muwaadiniinta Soomaaliya waxa ay ku nool yihiin ama ka hooseeyaan marxaladda saboolnimada*

Arrintani waxa ay abuureysaa wax u muuqda xasilooni darro siyaasadeed oo aan kala go'lahayn iyo dowlad aan wax qabad lahayn, waa marka la rabo in laga hortago fowdooyinka u dhaca sida lama filaanka ah ee rabshadaha wata iyo in la faafiyo bixinta adeegyada iyo waliba in amniga lagu baahiyo dalka oo dhan. Iyada oo Soomaaliya si isdaba joog ah loogu qiimeeyay in ay tahay mid ka mid ah dalalka adduunka ugu musuqmaasuqa badan uguna hufnaanta yar, haddana waxa ay ku fashilantay in ay abuurto jawi siyaasadeed oo isla xisaabtan, kalsooni dadweyne iyo ka qaybgalka dawlad wanaagga lagu saleeyo.

Marka laga hadlayo dowladnimada, ereyga 'wanaag' micnihiisu maaha hadaltiro iyo kalmad falasafadeed, balse waa qodob muhiim u ah nolosha iyo badqabka muwaadiniinta Soomaaliyeed oo dhan. Waa muhiim in Soomaaliya kor looga soo qaado meeshii ay joogtay sannadihii ku suntanaa dibu dhaca iyo rajo beelka. Maxaa yeelay boqolkiiba 80 muwaadiniinta Soomaaliya waxa ay ku nool yihiin ama ka hooseeyaan marxaladda saboolnimada.[3] Arrinta muhiimadda ugu weyn lihi waa in dalku leeyahay xeebta ugu dheer Afrika, xoolo tiro badan, dhul beereed, kuwaas oo haddii dalku helo maamulkiisa saxda ah, uu si fudud haqabbeel u gaadhsiin karo Geeska Afrika.[4]

> *Waxaa intaa dheer, siyaasiyiinta Soomaaliya ma raadsadaan wax la isku waafaqsan yahay, bulshadana kuma dhiirrigeliyaan ka qaybgalka siyaasadda*

Shaqo la'aanta dhallinyaradu waxa ay hadda maraysaa 67%.[5] Waxbarashada aasaasiga ahi waxa ay noqotay mid gaar loo leeshay oo si weyn looga beec-mushtaro, taas oo sababtay in aanay saddex milyan oo carruur ahi dugsiyada dhigannin.[6] Horumarka dawlad wanaaggu waa mid daciif ah, hab-dhaqanka siyaasadduna waa hardan iyo xifaaltan. Dadka caadiga ahi lama ay jaanqaadin faa'iidooyinka dawladnimada curdan ka ah, taas oo muwaadiniinta gayeysiiyey in ay siyaasadda nacaan, kaliya lama ay colloobin ka hadalkeeda, balse waxa ay ka quusteen dalbashada qodobbo wax ku ool ah oo ku salaysan dawlad wanaagga. Waxaa intaa dheer, siyaasiyiinta Soomaaliya ma raadsadaan wax la isku waafaqsan yahay, bulshadana kuma dhiirrigeliyaan ka qaybgalka siyaasadda.

---

3 http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2020/11/HCD-Strategy-English-version.pdf
4 http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2020/06/June-2020-FISHERIES-REPORT.pdf
5 http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2020/08/Labor-HCDM-REPORT-1.pdf
6 http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2020/08/Education-HCDM-REPORT-.pdf

Guuldarrada ka dhalatay in muwaadiniinta laga qaybgalin waayo geeddi-socodka dhismaha dawladnimada ayaa sababtay quus aan dhammaad lahayn. Mid ka mid ah dadkii doodda loo qabtay ayaa Machadka Heritage u sheegay, "in Soomaaliya ay musuqmaasuqeen siyaasiyiin qurbaha ka timid oo dhuuni raac ahi, kuwaas oo aan dan ka lahayn mustaqbalka dalka", kuwo kale na waxa ay dawladda Soomaaliya ku sheegeen urur ganacsi oo ay qurbajoogtu u soo raadsadaan xirfad hoggaamineed iyo tabcasho dhaqaale.[7] Sidaa darteed, fadhiidnimada dawladda Soomaaliya iyo caqabadda dawlad xumadu waxa ay guud ahaanba salka ku hayaan in lagu guuldarrastay in muwaadiniinta laga qaybgalinyo geeddi-socodka dhismaha dawladnimada. Afyare Cilmi, oo arrinta Soomaaliya ka hadlay ayaa qaba "in ay aad u liidato fahanka ay siyaasiyiintu ka haystaan waddaniyadda.[8]

Mar haddii aanay muwaaddiniintu lahayn dareen la xiriira qaabka ay dawladda hadda jirtaa u shaqaynayso, hab-dhaqanka dawladnimaduna si taas la mid ah ayaa uu uga go'an yahay baahida dadka iyo halgankooda maalin laha ah. Aragti ahaan, nuglaanta qarannimada Soomaaliya waxa ay ku jaan go'an tahay waxa uu Douglass North, oo ahaa dhaqaaleyahan iyo aqoonyahan cilmiga bulshada ku xeeldheer oo Maraykan ahi ku qeexay ''nidaam xaddidan" oo dawladeed, kaas oo helitaanka khayraadka ee dalka laga dhigo mid sedbursiinyo lagu kasbado balse aan xuquuq muwaaddin ahayn, mana jirto cid xukunta marka la eego ka hortagga rabshadaha kadiska ah ee dalka ka dillaaca iyo sida oo kale in loo hoggaansamo ku dhaqanka sharciga.[9] Nidaamkan xaddidan ee dowladnimadu waxa uu abuuraa shabakad musuqmaasuq, iyada oo loo marayo taageero siyaasadeed iyo isdhexgal shaqsiyadeed, taas oo meesha ka saartay curashada hay'ado aan cid gaar ahi lahayn.

Ku dhaqanka siyaasad-xumada ayaa caqabad ku ah in xirfad iyo aqoon lagu soo xusho shaqaalaha hay'adaha dawladda. Tusaale ahaan, sida loogu kala faro-dhuudhuuban yahay xiriir ka taliska iyo u guulwadaynta siyaasaddooda ayaa ugu horreyn go'aamisa magacaabista xilalka dawladda ee muhiimka ah sida safiirrada, agaasimayaasha wasaaradaha iyo golaha wasiirrada.[10] Danayn la'aanta waxqabadka iyo aqoonta, ayaa u muuqda in ay yihiin sababaha keenay in hay'adaha dawladdu u dhaqmaan sidii meherad qof gaar ahi leeyahay, taas oo astaan u ah dawlad -xumada joogtada ah, isla markaana keentay in rabitaanka shaqsiga laga doorbido qiimaha shaqaale rayid ah oo leh aqoon iyo waxqabad muuqda.[11]

---

7 HIPS interview with an academic 15, December 2020, Qardho.
8 Developing an inclusive citizenship in Somalia: Challenges and opportunities. file:///C:/Users/Envy14/Downloads/Developing_an_Inclusive_Citizenship_in_S%20(1).pdf
9 North, D., Wallis, J., & Weingast, B. (2009). Violence and Social Orders: A conceptual framework for interpreting recorded human history. Cambridge University Press.
10 HIPS interview, 18 December, Garowe.
11 HIPS interview, 4 October, 2020, Mogadishu.

Hay'adaha madaxabannaan ee dadweynaha u siman ayaa looga tusaale qaataa dawlad wanaagga, taas oo ku dhaqanka siyaasadda iyo dhexdhexaadinta danaha la isku maandhaafsan yahay ka dhigaysa kuwo la sii saadaalin karo, sababta oo ah ku dhaqanka sharciga isku-dhafan ayey hay'adaha dawladu ku muujiyaan sharcinimadooda. Hay'adaha dawliga ah ee dadweynuhu u simanyahay, haddase aan Soomaaliya ka jirin ayaa xasiliya siyaasadda, xoojiya xallinta khilaafaadka, jidkana u xaara soo bixitaanka waxa uu Douglass North ugu yeeray ''nidaam dawladeed oo helitaankiisu furan yahay" kaas oo muwaadiniinta loola dhaqmo in ay u siman yihiin helitaan faa'iidooyinka dhaqaale, iyada oo ka qeybgalka siyaasaddu tahay xuquuq mudwaaddin balse aanu ahayn mudnaan cid loogu sedburiyo.[12] Marka arrintan loo eego, Soomaaliya aad ayay ugu liidataa codka dadweynaha iyo ka qaybgalinta siyaasadda. Muwaadiniintu si toos ah uma soo doortaan wakiilladooda, waanay ku kala qaybsanyihiin arrimaha siyaasadda, sida oo kale ma jiraan hay'ado shaqaynaya oo bixinaya adeegyo la isku hallayn karo, taas ayaana niyad jab ku keentay dadweynaha. Marka la soo koobo, muwaadiniinta Soomaaliyeed waxa ay u muuqdaan in ay ka gaabiyeen ka qaybgalka nidaamka dawladeed ee burbursan, taas oo ay fursadda saamayntooda u arkaan mid kooban, maxaa yeelay madalihii la gula xisaabtami lahaa jileyaasha siyaadda, iyaga uma furna.[13]

# 3. Habraaca Daraasadda

Cilmibaareyaashu waxay sameeyeen sahan ay su'aalo waraysi ah ku waydiinayeen 23 qof oo isugu jira, saraakiil dawladeed, xildhibaanno, xubno ka tirsan bulshada rayidka ah, aqoonyahanno, wariyeyaal, garsoorayaal fadderaalka ah iyo xeer ilaaliyeyaal guud. Waxa kale oo ay cilmibaadheyaashu waraysteen siyaasiyiin ka hawlgala waaxda bangiyada, hay'adaha dawliga ah iyo xubno ka tirsan guddiga madaxa bannaan ee dibu eegista iyo hirgelinta dastuurka. Xogta waa la qoray, waana la falanqeeyay. La waraystayaasha waxa lagu soo xushay aqoontooda iyo xirfadda ay u leeyihiin arrinta laga hadlayo iyo xilka ay hadda ka hayaan hay'adaha dadweynaha. Intaa waxa dheer, cilmibaareyaashu waxa ay dibu-eegis ku sameeyeen daraasado badan oo laga sameeyay dawlad wanaagga, sida oo kale, waxa ay milicsadeen warbixino ku salaysan hufnaanta iyo musuqmaasuqa.

# 4. Dibu eegista daraasadaha

Bangiga adduunka ayaa markii ugu horraysay dalalka soo koraya ugu soo dhex dhuuntay aragtida dawlad wanaagga, si uu "uga takhalluso dabarrada sharciga ah ee u diidaya in uu soo faragaliyo arrimaha gudahooda" sannadkii 1989.[14]

---

12 North, D., Wallis, J., & Weingast, B. (2009). Violence and Social Orders: A conceptual framework for interpreting recorded human history. Cambridge University Press.
13 HIPS interview, 3 November, 2020, Mogadishu.\
14 https://www.tandfonline.com/doi/abs/10.1080/13511610.2013.850020

“Wanaagga’ ku duugan dawlad wanaaggu ma aha fikrad meel taagan, balse marka aynu daalacanno hadal uu yiri xoghayahii Qaramada Midoobay ee Koofi Anan, “dawlad wanaaggu waa lafdhabarta dabargoynta saboolnimada iyo kor u qaadista horumarka,”[15] muhiimaddu se waa in uu dhaqanka dawlad wanaaggu ka yimaaddo bulshada gudaheeda, oo uu noqdo yool qaran. Marka loo eego dhinacyada dhaqaalaha iyo siyaasadda, Soomaaliya ma laha rabitaan gudaheeda ka yimaadda oo bulsho iyo siyaasad dawladeed oo qaabaysan. Dhanacyada siyaasadda iyo dhaqaalaha, Soomaaliya waxa ka maqan siyaasad jaangoysa dawlad wanaagga ka yimaadda bulshada dhexdeeda.  Arrintani waxa ay xannibtay jiritaanka hay’ado leh maamul-daadajin dadweyne oo shaqaynayaa. Marka la eego, ‘wanaagga’ ku duugan dawlad wanaagga, waxa uu inta badan qeexaa xiriirka ka dhaxeeya horumarka ku yimaadda dabeecadda dawladda iyo awoodda ay ugu adeegto muwaadiniinteeda.

Dawlad wanaagga waxaa loo arkay in uu yahay sed iyo suldhabaale dibadeed oo lagu dhiirrigelinayo dalalka haray ee dawlad-xumadu ragaadisay, si ay u bilaabaan dibuhabeyn gudahooda ka timaadda. Ficil ahaan, dawlad wanaaggu waa dedaal laga midaysan yahay oo lagu doonaayo in lagu xalliyo dhibaato guud. Hannaanka lagu gaarayo waxa uu u baahan yahay hiraal siyaasadeed, oo ay ku yar yihiin damacyada iyo danaha qofeed. Meesha danaha shaqsiga laga horumariyo kuwa dawladnimada, dedaalka wadajirku waa uu ku hagaasaa, bulshaduna siyaasadda ayey ku kala qaybsantaa.[16] Dalalka ay dagaalladu naafeeyeen sida Soomaaliya, dawlad wanaagga, waxa lagu gaari karaa in si wada jir ah loo dhiso dawladaha hoose, gobollada iyo qaranka ba, oo ah sida ku xusan dastuurka kumeelgaarka ah. Kala qaybsanaanta siyaasadda ayaa caqabad ku ah koboca tiirarka dawlad wanaagga.

Marka laga hadlayo maamulka dowliga ah, Bangiga Adduunku ‘dawlad wanaagga’ waxa uu ku qeexay ‘’ caadooyinka hay’adaha ee lagu maamulo awoodda guud ee waddanka.” Marka lagu saleeyo qeexitaankan, kobaca iyo horumarka dhaqaale ee ay ku tallaabsadaan xarumaha gaarka loo leeyahay laguma fasiro in ay ka mid yihiin tilmaameyaasha dawlad wanaagga. Muhiimadduna waxa ay daaran tahay hufnaanta hay’adaha dawliga ahi, ay ku bixiyaan adeegyo muwaadiniintu u siman yihiin iyo ku baahinta gobollada. Dawlad xumada Soomaaliya ka jirtaa waxa ay ka timid waxqabad la’aanta hay’adaha dowladda. Falanqeyn ahaan, Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay, waxa uu dawlad wanaagga ku sifaynayaa nidaam kor loogu qaadayo arrimahan soo socda: “dhiirrigelinta shaqaalaha, tababarka shaqaalaha rayidka ah, maamul daadajinta iyo baahinta maaliyadda iyo waliba wadahadal ka dhaxeeya dowladda iyo bulshada rayidka ah.”[17]

15 file:///C:/Users/Envy14/Downloads/SPAS_7_43.pdf
16 https://library.fes.de/libalt/journals/swetsfulltext/15164499.pdf
17 file:///C:/Users/Envy14/Downloads/GovernanceinPakistan.pd

Maamulka iyo baahinta maaliyadda ayaa loo tixgaliyaa in ay isu soo dhaweeyaan dawladda iyo dadweynaha, halka uu tababarku kor u qaado karaanka shaqaalaha rayidka ah. Dhiirrigelintu, ha noqoto mid maal ama mid nafsadeede, waxa ay ku dhiirrigelisaa shaqaalaha ka shaqeeya hay'adaha dawladda in ay dardar-geliyaan wax ku oolnimada adeegga ay bixinayaan. Tani waxa ay muujinaysaa in tayada dawlad wanaaggu, ay ku tiirsan tahay xiriirka ka dhaxeeya dawladda iyo muwaadiniinta uu dal kastaa leeyahay.

> *Markan oo kale, fadhiidnimada dowladnimada Soomaaliya iyo dawlad xumaanta joogtada ah, waxa ay u muuqdaan in ay ka dhasheen awood la'aanta siyaasiyiinta oo aan si taxaddar iyo iskaashi ku dheehan yahay u adeegsan farsamooyinka maamulka.*

Markan oo kale, fadhiidnimada dowladnimada Soomaaliya iyo dawlad xumaanta joogtada ah, waxa ay u muuqdaan in ay ka dhasheen awood la'aanta siyaasiyiinta oo aan si taxaddar iyo iskaashi ku dheehan yahay u adeegsan farsamooyinka maamulka. Haddaba si ay u jaangooyaan ama isu waafajiyaan danaha la isku diiddan yahay, waxa muhiim ah in ay u hoggaansamaan sharciga, una fuliyaan si rasmi ah ama aan rasmi ahayn laakiinse waafaqsan maslaxadda ummadda. Heshiisyada rasmiga ah waxa loola jeedaa kuwa loo hoggaansamo adeegsiga dastuurka iyo garsoorka si loo xalliyo khilaafaadka, halka heshiisyada aan rasmiga ahayn loola jeedo heshiisyada ay isku afgartaan hoggaamiyeyaasha gobollada iyo kuwa qaranku.[18]

Soomaaliya waxa ka maqan nidaam dawladnimo oo wax kala hagaya, iyada oo aan la rabin in la ixtiraamo maqsadka iyo waraaqaha dastuurka ku meelgaarka ah, taas oo caqabad ku noqotay kobcinta aragtida guud ee istaraatijiyadeed, mana jiraan yoolal laga midaysan yahay oo loo dijiyey, sidii loo buuxin lahaa heerarka dowlad wanaagga.

Tan micnaheedu waa in la yiraahdo ma jiro nidaam dawladeed oo isku dubbaridan oo aan la siyaasadayn, mana jiraan barnaamijyo qaran oo loo isticmaali karo in lagu cabbiro wixii lagu gaari lahaa afarta illaa shanta sano ee soo socda iyo wixii ka dambeeya. Qorshaha Horumarinta Qaranka ee afarta sano, ee loo yaqaanno NDP-9, ayaa ah kan ugu dhaw balse waxa uu u muuqdaa in uu yahay mid wasaaraddu iska wadato, isla markaana aan waxba ka tari doonin yagleelidda waxyaabaha aasaaska u ah dowlad wanaagga.

Tan oo kale, waxaa la oran karaa, ma jiro nidaam dowladeed oo isku dubaridan oo aan la siyaasadeyn iyo barnaamijyo qaran oo loo adeegsan karo cabir ahaan wixii lagu gaari lahaa afar illaa shan sano iyo wixii ka dambeeya. Sida laga soo xigtay xubin ka tirsan golaha sare ee shacabka, awood la'aanta dawladda waxa keenay natiijada ka dhalatay foolaadka siyaasadeed ee Soomaaliya oo aan dan ka lahayn horumarinta dowlad wanaagga iyo horumarinta siyaasadaha xirirsan ee qaranka iyo sida ay u kala mudan yihiin.[19]

---

18 file:///C:/Users/Envy14/Downloads/SPAS_7_43.pdf
19 HIPS interview, 11 November, 2020, Mogadishu.

# 5. Geeddi-socodka Dowladnimada Soomaaliya

> “Hoggaannadii ka danbeeyey gumaystahu waxa ay muujiyeen dareen Soomaali weyn oo siyaasi ah iyaga oo rajo ka qabay midaynta dhulkii Soomaalida ee gumaystuhu kala seertay

Dood ku saabsan caqabadaha hortaagan dawlad wanaagga Soomaaliya, ayaa lagama maarmaan u ah hilaadinta geeddi-socodka ku yimi dowladnimada Soomaaliya wixii ka danbeeyey gumeysiga. Bilowgii qarnigii 19-naad, quwadihii gumeystuhu waxaa ay dhulka Soomaalida u kala qaybiyeen shan maamul oo leh xuduudo gumaysi. Koofurta Soomaaliya waxa ay hoos tagtay gumeysiga Talyaaniga halka gobolka woqooyi uu hoos tagay maxmiyaddii Ingiriiska. Faransiisku waxa uu qaatay Jabuuti, halka Ogaadeeniya, oo maanta ah dawlad-goboleed Soomaaliyeed oo ku yaalla bariga Itoobiya iyo Gobolka Soohdinta Waqooyi oo hadda ah gobolka waqooyi-bari ee Kenya, si gumaysi ah loogu daray Itoobiya iyo Kenya. Dharaarihii xorriyadda, maxmiyaddii Ingiriiska iyo qaybtii gumaysiga Talyaaniga ayaa midoobay, waxa aanay samaysteen Jamhuuriyadda Soomaaliya sannadkii 1960, iyaga oo u ololeeyay sidii loo raadin lahaa dowlad Soomaaliyeed oo metasha Soomaali weyn. Hoggaannadii ka danbeeyey gumaystahu waxa ay muujiyeen dareen Soomaali weyn oo siyaasi ah iyaga oo rajo ka qabay midaynta dhulkii Soomaalida ee gumaystuhu kala seertay. Balse dhaxalkii gumaystaha waxa uu reebay caqabad aan laga dul tallaabsan karin.

Marka loo eego heerka dawladnimo, “jamhuuriyada cusubi, waxa ay la kawsatay kala-duwanaansho kaga yimid dhinacyada sharciga, luuqadda, xafiisyada dawladda iyo waliba hab-shaqeedyada rasmiga ah” kuwaas oo ay ka tageen labadii gumeyste ee hore.[20] Haddii aynnu isbarbardhigno, Ingriisku waxa uu waqooyiga kaga tegey qaab caddaalad ahaan u abaabulan, oo ay qaab-dhismeedka xafiisyada dowladdu ay wanaagsan yihiin. Sida uu sheegayo Cabdi Samatar, maamulkii gumaysigu waxa uu nidaamiyay aasaaska xafiisyada “imtixaannada sannadlaha ah, bixinta shahaadooyinka iyo jaangoynta heerarka waxbarashada “waxa aanu seeska u dhigay ku habboonaanta shaqada iyo mushaharka shaqaalaha dawladda. Haddii Ingiriisku dejiyey qaab dhismeed si caddaalad ah u abaabulan oo dawlad wanaag ah, maamulkii gumeystaha Talyaaniga ee koofurtu waxa uu dhiirrigeliyey ku dhaqanka dowlad-xumada. Siyaasiyiintii la magacaabay waxa ay qabsadeen hay’adaha dowliga ah, xiriirka uu qofku la leeyahay dawladdana waxa go’aamiyay kaalinta xilka uu hayo.[21]

Laga soo bilaabo 1960-1964, hoggaankii Soomaaliyeed ee ka danbeeyey gumaystaha waxa uu la daalaadhacayey iswaafajinta kala duwanaanshaha u dhaxeeya khibradaha siyaasadeed, nidaamyada dawliga ah iyo hab-maamulka labada xuduud gumaysi, si loo dajiyo qorshe qaran oo isku mid ah. Horumar kooban ayaa laga sameeyey dibuhabaynta hay’adaha dawladda, waxqabadka guud ee dawladduna waxa uu ahaa mid xaddidan.

---

20 https://library.fes.de/libalt/journals/swetsfulltext/11220689.pdf
21 A. Samatar, (2016). Africa’s first democrats: Somalia’s Aden A. Osman and Abdirizak H. Hussen. Indiana University Press.

Doorashadii demuqraadiga ahayd ee lagu doortay Aaddan Cabdille Cismaan iyo tallaabadii ku xigtay ee Cabdirisaaq Xaaji Xuseen loogu magacaabay raysalwasaaraha ayaa loo aqoonsaday in ay tahay dibuhabayn ballaaran oo lagu sameeyey waaxdii dawladda ee mariilka ahayd. Waxa ay aqoonyahanku si weyn isugu waafaqeen in hawlwadeennada shaqaalaha dawladda laga dhigay dad takhasusaad aqooneed leh; wasiirradii uu magacaabay raysalwasaaruhu waxa uu ku soo xushay mudnaanta tayada aqoontooda iyo kala soocidda awoodda laamaha dawladda, taas oo jirtay intii u dhexeysay 1964 -1967. Doorashadii labaad ee madaxtooyada iyo golaha shacabka ee dhacday sannadkii 1967 waxa ay adhaxda ka jabisay dhammaanba guulihii la gaaray.

Musuqmaasuq, qabyaalad iyo danaysi ayaa beddelay kartidii iyo tayadii aqooneed ee dawladnimada. Markii ay ahayd 1969, xirfaddii shaqaalaha dawladda, waxqabadkii xafiisyada iyo kala sooociddii awoodaha laama dawladda ayaa burburay, taas oo dadweynaha ku keentay rajobeel iyo quus xargaha goosatay. Quustan ku timi dadweynaha iyo dayaca siyaasadeed oo lagu daray dilkii madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaarke ayaa waddada u sii xaadhay inqilaabkii milliteriga ee aan dhiiggu ku daadan.

Marka laga yimaaddo bilowgii soo shaacbixidda, oo ay tisqaadeen mashaariic horumarineed, dawladdii kalitaliska ahayd waxa ay baabiisay dhammaan  tiirarkii dawlad wanaagga, iyada oo laashay dastuurkii, golihii shacabkana kala dirtay, sida oo kale na xirxirtay siyaasiyiintii ay u arkaysay in ay ka soo horjeeddaan. Waxa ay dalka ku xukumaysay digreeto madaxweyne ilaa burburkii 1991. Sida uu sheegay Robert Rotberg oo ah cilmi baare maraykana, tan iyo maalintaas dalka Soomaaliya waxaa lagu calaamadiyey tusaalaha koowaad ee adduunku ku tilmaansado dal fashilmay.

Quwadaha caalamiga ah iyo kuwa gobolkuba waxa ay ku tilmaameen in dalka ku yaalla Geeska Afrika ee Soomaaliya "dal naftiisa dagaal kula jira' isla markaana qatar ku ah amaanka adduunka, waxa aanay abaabuleen shirar nabadayn iyo dibuheshiisiin ah oo taxane ah. Shirkii Jabuuti ee magaalada Carta lagu qabtay 2000, waxa dib loogu soo dhisay dawlad ku salaysan qaacido beeleedka 4.5, dalkuna 2004, waxaa uu qaatay nimaad fadderaal ah oo aan qeexnayn, sida oo kale 2012, ayaa la sameeyey dastuur ku meelgaar ah.

Muddadii ku meelgaarku waxa ay ku dhammaatay sannadkii 2012, sida oo kale sannadihii 2012 iyo 2016 dalka waxa ka qabsoomay  laba doorasho oo isku xiga, kuwaas oo ay kormeerayaasha caalamku ku sifeeyeen aabbeyaasha musuqmaasuqa iyo dawlad xumada.[22] Dhaqan-xumo doorasho oo kuwaas la mida ayaa la filayaa in la arki doono doorashooyinka soo socda ee madaxtooyada iyo golaha shacabka ee qabsoomaysa 2021.[23]

---

22 Somalia elections: 'huge corruption' https://www.bbc.com/news/world-africa-38105023

23 http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2020/11/Preserving-the-Integrity-of-the-Election.pd

> Qaybahan soo socda waxa aannu ku lafaguraynaa caqabadaha maanta hortaagan dawlad wanaagga Soomaaliya. Kuwaas oo kala ah: tixgalin la'aanta ku dhaqanka sharciga, isla xisaabtan la'aanta hufnaan la'aanta iyo musuqmaasuqa baahsan iyo waxqabad la'aanta dawladdan

Laakiin jiritaanka dawladdu si weyn uguma xirna awoodda hay'adaheeda iyo ka qaybgalka dadweynaha, balse waxa uu ku tiirsanyahay taageerada bulshada caalamka. Muddo kordhintii ugu dambeysay ee loo sameeyay Howlgalka Kaalmeynta UN-ka ee Soomaaliya (UNSOM) iyo Howlgalka Midowga Afrika (AMISOM) ee ay maalgaliyaan Midowga Yurub, ayaa tilmaamaya halista ay leedahay nuglaanta dawladda Soomaaliya, taas oo aan lahayn tamar ay dib ugu soo nooleyso qaabdhismeedyadii aasaaska u ahaa dawlad wanaagga.[24]

Qaybahan soo socda waxa aannu ku lafaguraynaa caqabadaha maanta hortaagan dawlad wanaagga Soomaaliya. Kuwaas oo kala ah: tixgalin la'aanta ku dhaqanka sharciga, isla xisaabtan la'aanta hufnaan la'aanta iyo musuqmaasuqa baahsan iyo waxqabad la'aanta dawladda.

# 6. Caqabadaha hortaagan dawlad wanaagga

## 6.1 Tixgalin la'aanta ku dhaqanka sharciga

> Curyaaminta ku dhaqanka sharciga waxa ay dhalisaa xasillooni darro siyaasadeed oo aan dhammaad lahayn iyo tartanka foolaadka oo aan xaddidnayn

Nugaylka Soomaaliya iyo dawlad-xumadeeda, waxaa laga dheehan karaa foolaadka siyaasadda oo aan ixtiraamin ku dhaqanka sharciga. Sida oo kale geeddi-socodka dowlad dhisiddu kuma salaysna mabaadii dastuuri ah iyo heshiisyada la dejiyey, taas oo maamulka ka dhigaysa fowdo la kala dhaxlay. Curyaaminta ku dhaqanka sharciga waxa ay dhalisaa xasillooni darro siyaasadeed oo aan dhammaad lahayn iyo tartanka foolaadka oo aan xaddidnayn. Haddii ay xasiloonida siyaasaddu tahay hooyada tilmaamayaasha dawlad wanaagga, ku dhaqanka sharcigu waa isha ay ka timaaddo awood siyaasadeed oo sharci ah. Qeexidda sharcigu waxa ay ku xirantahay duruufaha kala duwan ee siyaasadeed, bulsho, dhaqaale, iyo dhaqameed, guud ahaanna waxa loola jeedaa ''nidaam maamul oo sharcigu awood u leeyahay in uu ku soo rogo xakamayn macno leh dalka iyo shakhsiyaadka foolaadka u ah xukunka dawliga ah."[25]

Qodobka 4-aad ee dastuurka ayaa qeexaya, "Shareecada ka dib, in uu dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya yahay sharciga ugu sarreeya dalka. Dastuurku waxa uu xakameeyaa dowladda, waxa aanu hagaa dedaallada siyaasadeed iyo go'aannada laga gaarayo dhammaan hay'adaha dowladda. Laakiin daneeyayaashu waxa ay tixgelinayaan in isla dastuurkan aan dhameystirneyn, ee bilaa xakamaynta ah, mana jiro qaab kale oo sharciya, oo shaqeynaya oo xayiraad macno leh saaraya dabaqadda siyaasadda Soomaaliya. Tallaabo dib loogu soo nooleynayo nidaamka caddaaladda, oo uu qaaday Madaxweyne Shiikh Shariif Shiikh Axmed ayaa dibudhis ku sameeyay Guddidii Adeegga Garsoorka Soomaaliya ee ugu horreysay tan iyo burburkii dowladdii dhexe 1991.

24 https://www.whatsinblue.org/2020/06/un-assistance-mission-in-somalia-unsom-mandate-renewal-3.php
25 Botero, J., & Ponce, A. (2010). The world justice project: Measuring the rule of law. file:///C:/Users/Envy14/Downloads/SSRN-id1966257.pdf

Laakiin Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud ayaa kala diray Guddidii Adeegga Garsoorka sannadkii 2016, si meesha looga saaro guddoomiyihii maxakamadda sare ee waqtigaas, Caydiid Cabdullaahi (Ilkaxanaf). Sida oo kale Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Farmaajo ayaa shaqada ka ceyriyay Ilkaxanaf oo ahaa ninkii uu beddelay, Ibraahim Iidle Suleyman, iyada oo aan loo marin hannaan sharci ah 2018.[26]

Tani waxa ay xadgudub ku tahay qodobka 106-aad ee dastuurka kumeelgaarka ah, oo sheegaya ''in garsoorku ka madaxbannaan yahay sharci dajinta iyo hay'adaha fulinta dowladda, si ay garsoorku u fushadaan howlahooda."[27] Dastuur ahaan, Guddida Adeegga Garsoorku waa in ay u shaqeeyaan sida difaac guud oo ilaalaynaya faragalinta ay siyaasadda iyo qaraaba kiilku ku yeelanayaan arrimaha garsoorka, si ay u sugaan badaxbannaanida garsoorka. Qodobka 109A ee dastuurka kumeelgaarka ahi, waxa uu qeexayaa in ay Guddida Adeegga Garsoorku '' ka koobnaadaan sagaal (9) xubnood: guddoomiyaha maxakamadda dastuurka, guddoomiyaha maxakamadda sare, xeer ilaaliyaha guud, laba (2) xubnood oo ka tirsan ururka qareennada qaranka Soomaaliyeed, oo ay soo magacawday Jahliyadda Sharciga ee Soomaaliya, kuwaas oo ay uu muddo xileedkoodu yahay afar sano, iyo sida oo kale guddoomiyaha guddida xuquuqal insaanka iyo waliba saddex (3) qof oo sumcad weyn ku dhex leh bulshada Soomaaliyeed, oo ay soo jeediyeen golaha wasiirradu, ka dibna uu magacaabay madaxweynahu." Waxa wax lala yaabo ah in maxakamadda dastuurka, ururka qareennada qaranka Soomaaliyeed iyo guddida xuquuqal insaanku aanay dhisnayn.

Qaab-dhismeedkii iyo xubinnimadii Guddidii Adeegga Garsoorka ee uu Xasan Shiikh Maxamuud kala diray 2016 iyo caynka ay hadda ku shaqeyso, ee uu madaxweyne Farmaajo dibu soo cusbooneysiiyay 2020, ma waafaqsana shuruudaha dastuurka. Cawaaqib xumadu waxa ay ka dhalatay mariilnimada nidaamka garsoorka, oo sida laga soo xigtay qareen rug-caddaa ah, lagu muquuniyey dhalangaddi siyaasadeed, si ay u noqoto mid fadhiid ah oo aan isdifaaci karin.[28] Garsoore ka tirsan maxakamada racfaanka federaalka ayaa u xaqiijiyay cilmibaareyaasha Machadka Heritage in laanta fulinta dowladdu ay ka dalbaneyso garsoorayaasha daacadnimo siyaasadeed. Tusaale ahaan, dawladdu waxa ay shaqada ka eriday garsoore rug-caddaa ahaa oo amar ku bixiyey in la sii daayo Cabdiraxmaan Cabdishakuur, oo ah siyaasi mucaarad ah, kaas oo ay dawladdu gurigiisa weerartay, kadibna maxakamad la soo taagay.[29]

Marka la eego, in Soomaaliya la isku xukumo sharciga iyo dhaqangalkiisa waxa ka maqan, "mabaadii dawladeed oo si guud loo shaaciyey, kuwaas oo dadka oo dhan loo gula xisaabtamayo si isku mida, looguna xukumayo si madaxbannaan."[30]

---

26 Omondi, J. (2028). Somalia's President Farmajo sacks Chief Justice. https://africa.cgtn.com/2018/05/27/somalias-president-farmajo-sacks-chief-justice/
27 HIPS interview, 3 November 2020, Mogadishu.
28 HIPS interview, 3 November 2020, Mogadishu.
29 HIPS interview, 3 November, 2020, Mogadishu.
30 Botero, J., & Ponce, A. (2010). The world justice project: Measuring the rule of law. file:///C:/Users/Envy14/Downloads/SSRN-id1966257.pdf

“

*Heerarka dawladeed iyo doorarkooda sharci iyo masuuliyadaha ay kala leeyihiin laguma qeexin dastuurka*

Mabda ahaan, qodobka 121-aad ee dastuurka kumeelgaarka ah ayaa dhigaya in “la iswaafajiyo dastuurka Jamhuuriyadda Fadderaalka Soomaaliya iyo kuwa dawladaha xubnaha ka ah fadderaalka.” Iswaafajinta noocan ah lama sameynin, oo waxa aad u liita wadashaqeynta ka dhaxaysa garsoorka dowladda federaalka iyo kuwo dowladaha xubnaha ka ah.

Maxakamadda sare ee dowlad goboleedka Hirshabeelle, wali lama dhisin, maxakamadda sare ee dowlad goboleedka Galmudug ayaa muddo bil ah laga joogaa intii ay dhisnayd, sida oo kale maxakamadda sare ee dowlad goboleedka Koofur Galbeed dhawaan ayay bilowday in ay qaaddo kiisaskii ugu horreeyay. Heerarka dawladeed iyo doorarkooda sharci iyo masuuliyadaha ay kala leeyihiin laguma qeexin dastuurka. Sidaa darteed, dabeecadda wadashaqeyn la'aanta ah ee ka dhaxaysa daneeyayaasha siyaasadda Soomaaliya, ayaa keentay in ay maqnaanshaha fagaareyaal si guud loogu shaaciyo, si simanna loogu dhaqan geliyo, si madax bannaanna loogu xukumo, si loo horumariyo tilmaamayaasha dawlad wanaagga.

Mashruuca Caddaaladda Adduunka (WJP), oo ah urur ay leedahay bulshada rayidka ahi oo caalami ah, una ololeeya in dunida oo dhan sharci lagaga dhaqmo, ayaa tilmaamaya qaybaha lagama maarmaanka u ah waxa uu ururku ku tilmaamayo in ay yihiin nidaamka ku saleysan qawaaniinta, kuwaas oo sida soo socota la dhawrayo afar mab'da oo caalami ah:

• Dowladda iyo saraakiisheeda iyo wakiilladeeda waxa la gula xisaabtamayaa sharciga.

• Sharciyadu waa caddaan, waa la shaaciyey, waa joogto, waana caddaalad, waxa aanay ilaalinayaan xuquuqda aasaasiga ah, oo ay ka mid yihiin amniga dadka iyo hantidoodu.

• Nidaamka sharciyada lagu dhaqangaliyo, lagu maamulo, laguna xukumaa waa mid la heli karo, caddaalad ah, oo hufan.

• Helitaanka caddaaladda waxa suga garsoorayaal karti leh, madaxbannaan, oo anshax leh, xeer-ilaaliyeyaal ama wakiillo, iyo waliba saraakiil garsoor oo tiradoodu buuxdo, haystana khayraad ku filan oo ka tarjumaya bulshada ay u adeegaan.[31]

Xaqiiq ahaan, heerkasta oo ay tahay Soomaaliya kama jirto dowlad la gula xisaabtami karo wax sharci ah, nidaamka sharci ee hadda jiraana kama turjumayo nidaamka federaalka dowladnimada. Nidaamka caddaaladda si cad looguma qeexin dastuurka kumeelgaarka ah, mana aha mid la shaaciyey, oo joogtaysan, maxakamadahuna waxa ay adeegsadaan xeer-ciqaabkii 1960-naadkii.[32] Sharcinimada iyo ku dhaqanka qaynuunku ma aha mid gudo ahaan loo deegaameeyay, oo dowladda, saraakiisheeda iyo wakiilladeeda ayaa bilaaba sharci darrada.

31 Botero, J., & Ponce, A. (2010). The world justice project: Measuring the rule of law. file:///C:/Users/Envy14/Downloads/SSRN-id1966257.pdf

32 HIPS interview, September, 23, 2020, Mogadishu.

Tusaale ahaan, dowladda federaalka ayaa 2018, lagu eedeeyay in ay kicisay rabshadahii ka dhashay doorashada dowlad goboleedka Koofur-galbeed, si xukunka loo saaro musharraxa ay doorbideyso dowladda federaalku, tanina waa xadgudub la gula kacay dastuurka kumeelgaarka ah, kaas oo sheegaya in ay doorashadooda maamushaan dawladaha xubnaha ka ah faderaalku.

> *Waa loollan koox-koox ah oo u dhaxeeya heer fedaraal iyo heer dawlad-goboleedba, kaas oo caqabad ku ah horumarka dowlad-wanaagga Soomaaliya*

Afhayeenka baarlamaanka maamul goboleedka Puntland ayaa si lama filaan ah loo eryey halka Jubbaland tiro musharixiin ahi ay ku dhawaaqeen in ay yihiin madaxweyneyaal. Peter Leeson, oo ah barafaysor cilmiga dhaqaalaha iyo sharciga ka dhiga jaamacadda George Manson ayaa ku dooda in is-xukunka oo aan lagu dabbaqin sharciga uu abuuro, "xafiiltan kooxeed oo 'aan sharci ahayn, kaas oo u dhexeeya daneeyayaasha siyaasadda. Waa loollan koox-koox ah oo u dhaxeeya heer fedaraal iyo heer dawlad-goboleedba, kaas oo caqabad ku ah horumarka dowlad-wanaagga Soomaaliya.

Sidaas si la mid ah, arrimaha siyaasadda ee jilayaasha Soomaaliya, heer kasta oo ay yihiin waa mid aan sharciga ku salaysnayn. Taa beddelkeeda waxa hagaya daacadnimo xilligeedu kooban yahay iyo xaalad kala guur ah oo sharci darro ah. Maxakamaddii dastuuriga ahayd, oo marjac u noqon lahayd qalalaasaha dawladda ayaan wali la dhisin. Mid ka mid ah dadka la wareystay ayaa hab-dhaqanka daneeyayaasha siyaasadda Soomaaliya ku sifeeyay mid la mid ah, "dugaag is ugaarsanaysa oo xero la isugu ooday."[33] Si kale haddii loo dhigo, hab-dhaqankooda siyaasadeed ee ugaarsiga ahi, waa mid aan xuduud lahayn, iyaga oo uu dhaqma sidii in uu sharcigu ka hooseeyo hilaadda siyaasaddooda iyo in aanu awood u lahayn in uu xakameeyo dhibaatooyinka maamulka iyo baanaha awood maroorsiga.

Wali isbeddelada awoodaha qaab-dhismeedka hay'adaha way kobcayaan, iyada oo ay daba dheeraatay muddada kala guurka ah ee ay ku jirto dawladda nugul ee Soomaaliya. Sida laga soo xigtay garsoore fadderaal ah, kiisaska maxakamadaha federaalka badankoodu waxa ay la xiriiraan dhul iyo hanti, arrintaasina waa mid cago jiid ah oo aan waxtar lahayn. Sida laga soo xigtay garsoore sare oo ka tirsan maxakamadda sare ee federaalka, waxaana sababay hay'aduhu ma laha awood madax-bannaan oo ay ku fuliyaan xukunnada maxkamadaha.

Arrintani waxa ay u muuqataa in aanay saamilayda siyaasadda Soomaaliya doonaynin in ay aqbalaan in dawlada casriga ahi ay tahay '' hay'ado isu tagay, oo u shaqeeya sida hal unug, sharciguna qaabeeyo qaab-dhismeedka dawladda."[34] Tan micnaheedu waxa weeye haddii hal waax oo dawladda ahi ay hawlgabto ama dhibaato ku dhacdo, hay'adaha kale ee dawladdu waxa ay ka hawlgalayaan sidii ay u shaqayn lahayd, sharcigana ugu hoggaansami lahayd si loo xalliyo khilaafaadka.

---

33 HIPS interview, 24 September, 2020, Mogadishu.
34 Mungui-Pippidi, A. (2013). Becoming Denmark: Historical Designs of corruption control. file:///C:/Users/Envy14/Downloads/Becoming-Denmark-Historical-Lessons-Learned%20(1).pdf

Haddii aynnu barbardhigno, dhibaatooyinkii doorashada, isku shaandhayntii wasiirrada iyo waxqabad la'aantii xisbiga talada hayaa, si aad u yar ayay u carqaladeeyeen howlaha dawladda Danmaak, waana tusaalaha dawlad wanaagga ee ka jira dunida maanta.

Francis Fukuyama ayaa daraasaddiisa, Curashada Denmark (Getting to Denmark), ku doodaya in nuxurka dawlad wanaaggu yahay "in ay muwaadiniintu ka nabadgalaan awood-sheegasho shakhsiyeed, waana taas midda ay Denmark ku guuleysatay."[35] Arrintan waxa si weyn uga qayb qaatay in aad loo tixgaliyey ku dhaqanka sharciga, kaas oo hay'adaha dowladda ka ilaaliya jahwareerka siyaasadeed iyo isqabqabsiga xisbiyada. Si kale haddii loo dhigo, xafiisyada dowladda iyo hay'adaha dowliga ah ayaa si guul leh ugu kala safta khilaafaadka siyaasadeed ee maalin laha ah, balse bixinta adeegyadu waa kuwo dhawrsoon. Garsoorku waa madaxbanaan yahay, waxa aanu ku naalloodaa kalsoonida bulshada iyo mabaadi'deeda sharciga ah, sharciga ku dhaqankiisuna waxa uu ku qotomaa siyaasad bulsho iyo dhaqan taariikheed oo Dhaanishku leeyahay.

> *Saammilayda siyaasaddu horumar kooban ayey ka sameeyeen in dalka laga soo hayaamiyo nidaamkii sharci maroorsiga ahaa ee burburka ka horreeyay si loo dhaqangaliyo dastuurka ku meelgaarka ah*

Si ka duwan sida Denmark, nidaamka sharciga Soomaaliya ee rasmiga ahi, kuma xirna taariikhda bulsho-dhaqameed ee dadka Soomaalida. Sidaas oo ay tahay sharciga Soomaaliya ma dhex dhexaadin karto khilaafaadka siyaasadeed ee nidaamka federaalka, maaddaama sharciyadii gumaystuhu jaahwareeriyeen qaab dhismeedka sharciga Soomaaliya. Saammilayda siyaasaddu horumar kooban ayey ka sameeyeen in dalka laga soo hayaamiyo nidaamkii sharci maroorsiga ahaa ee burburka ka horreeyay si loo dhaqangaliyo dastuurka ku meelgaarka ah. Tixgalin la'aanta ku shaqanka sharcigu, waxa ay muujineysa in siyaasiyiinta iyo saraakiisha dowladda ee heerarka kala duwani, ay inta badan raadiyaan, "dhaqaale ay dhaafsadaan sharciga."[36] Haddii ay dabaqadda siyaasaddu jabiso ku dhaqanka sharciga, dadweynuhu waxa ay raadsanayaan meel ay caddaalad ka helaan oo aan rasmi ahayn.

Marka la qiimeeyo xaaladda bulshada, xeer-dhaqameedka, fiqiga diinta iyo maxakamaha Al-shabaab, ayaa ah goobaha si guud loogu kala xukumo khilaafaadka, waxaana sababay guuldarrada, waxqabad la'aanta iyo go'doominta ku habsatay dabeecadda garsoorka rasmiga ah ee Soomaaliya.[37] Hawlgabnimada garsoorka ayaa keentay waxa uu Michael Jana ku tilmaamayo "kalsooni darro weyn" oo ka timi helitaanka caddaaladda iyo in dadweynahu aamminnaan in aanay dawladdu u shaqaynin sidii ay muwaadiniintu ka rajaynayeen, taasina waxa ay caqabad ku tahay soo ifbixitaanka dowlad-wanaagga. Sidaa darteed, nidaamka garsoorka ee hadda jira iyo hab-dhaqanka siyaasadda Soomaaliya waxa ay noqonayaan wixii De-Waal uu ku sheegay, "ku diilbaxsanaanta dhiirrigelinta musuqmaasuqa iyo xasilooni darrada, '' iyo waliba in ay kooxahu sii joogteeyaan xafiiltanka[38] soo jireenka ah maadaama lagu sii indhacad yahay tixgalin la'aanta ku dhaqanka sharciga.

---

35 Mungui-Pippidi, A. (2013). Becoming Denmark: Historical Designs of corruption control. https://media.africaportal.org/documents/Getting-to-Denmark-Final.pdf

36 Jana, M. (2014). Understanding Political Legitimacy in African Emerging Democracies: The Judiciary, Symbolic, and Instrumental Legitimacy Interface, in Ewusi, S, & Butera, J. Beyond State-building: Confronting Africa's Governance and Socio-economic challenges in the 21st century. University for Peace Africa Program.

37 HIPS interview, 23 August, 2020.

38 De Waal, A. (2015).The Real Politics of the Horn of Africa: Money, War and the Business of Power. Polity Press.

## 6.2 Xasilooni darrada siyaasadda

Xasiloonida siyaasadda ayaa loo aqoonsaday in ay tahay hooyada dhasha dhammaan tilmaamayaasha dawlad wanaagga, halka xasilooni darrada dawladnimada loo arko," in ay keenaan rabshadahu,"[39]

Qeexitaankani waxa uu muujinayaa in xasiloonida siyaasaddu ay ka jirto meelaha aanay ka jirin iska hor imaadku, isla markaana maqnaanshaha rabshaddu ay yihiin tuseyaasha dowlad-wanaagga. Tuseyaasha dawlad-xumada, waxa ka mid ah dilalka siyaasadaysan, xarigga, dhibaateynta dadka ka soo horjeeda ama loo arko in ay mucaarad ku yihiin xukuumadda iyo awood maroorsiga, dhammaantoodna waxa sababa xasilooni darrada siyaasadda. Si kale haddii loo dhigo, heerka nabadgalyada, awoodda dowladda iyo tayada hay'adahu waxa ay ku tiirsan yihiin dal kastaaba heerka uu ka joogo xasiloonida siyaasadda. Claude Ake, oo ah Nayjeeriyaan, kuna xeeldheer siyaasadda dawladnimada ayaa si ballaadhan ugu qeexay xasiloonida siyaasaddu in ay tahay" in si joogto ah loo la jaanqaado hilaadinta isbeddellada siyaasadda."[40] Hilaadinta waxa looga jeedaa, arrimaha ay ka midka yihiin saadaalinta dhacdooyinka siyaasaddu, balse aan ku xaddidnayn  oo kaliya muddaynta doorashooyinka iyo hannaanka hay'adahu u dhexdhexaadiyaan khilaafaadka, halka isweydaarsiga loo fasiray dabarro sharci oo siyaasadeed, abaalmarinno iyo wareejin sharci oo awoodda cid laga qaadayo, si cid kale loogu dhiibo.

Mar haddii aanay darajooyinka siyaasadda, isbeddeladooda iyo wareejinta awooddu ku taagnayn qawaaniinta sharciga ah ee la dejiyay, saamilayda siyaasaddu waxa ay si isdaba joog ah u ayaa u gogol xaadhaysa xasilooni darrada dowladnimada. Soomaaliya gudaheeda, xasilooni darrada siyaasaddu waxa ay ku soohan tahay qaab-dhismeedka dowladnimo ee daciifka ah. Jiritaan la'aanta waxa uu Francis Fukuyama ku tilmaamay "tiirarka kala dambaynta": Xasiloonida siyaasadeed iyo ku dhaqanka sharciga ayaa sii hirgalinaya daciifnimada qaab-dhismeedka dawladnimada Soomaaliya.

Aragtida Fukuyama, meesha aanu ka jirin nidaam siyaasadeed oo kala danbayn lihi, ku tagrifalka adeegsiga sharciga dawladda qiil baa loo helayaa. Si kooban, xasilooni darrada siyaasadeed iyo hoos u dhaca ku yimid kalsoonida ka dhexeysa daneeyayaasha siyaasadda Soomaaliya ayaa ah in ay dowladda federaalku farageliso arrimaha gudaha ee dowladaha xubnaha ka ah federaalka iyo keenista Ciidamada Qaranka Soomaaliya oo loo fasirtay mid aan sharci ahayn. Intaas ka dib, xiriirka ka dhexeeya dawladaha xubnaha ka ah faderaalka iyo dowladda faderaalku waa mid aan is beddelin, halka qaabka doorasho ee 2020/2021 uu dhaliyey  xasilooni darro, taas oo caqabad ku ah geeddi-socodka  dowlad-wanaagga Soomaaliya.

---

39 Kaufmann, D. (2010). The Worldwide Governance Indicators: Methodology and analytical issues. http://info.worldbank.org/governance/wgi/pdf/WGI.pdf
40 Ake, C. (1975). A definition of Political Stability.
https://pdfs.semanticscholar.org/19b0/54f3cfa294fc87a3b85025132807bb6864c3.pdf?_ga=2.5758576.2114777747.1601894998-433876670.1568462440

*Haddii la doonayo in la horumariyo dowlad-wanaagga, xasiloonida siyaasadeed iyo ku-dhaqanka sharciga, "waa in si wadajir ah loo kobciyaa."*

Haddii la doonayo in la horumariyo dowlad-wanaagga, xasiloonida siyaasadeed iyo ku-dhaqanka sharciga, "waa in si wadajir ah loo kobciyaa." Waxa sii muhiimsan, xasiloonida siyaasadda, oo waxa ay awood siineysaa bulshada rayidka ah iyo muwaadiniinta ay khuseyso si ay u sii saadaaliyaan ficillada iyo hab-dhaqanka saamilayda siyaasadda. Haddii si kale loo dhigo, dariiqyada anshaxa iyo sharciyada dajisan, si dhakhso ah ayaa loo aqoonsadaa, waxaana la helaa qaabab sharciyeed oo lagu xalliyo khilaafaadka.

Halka uu ka jiro xukun dawladeed oo la isku hallayn karo, laguna kalsoon yahay dhibaatooyinka lama wada aqoonsan karo, maxaa yeelay xasilooni darrada siyaasadeed ayaa ku soo dhex dhuumata. Soomaaliya waa ay dafirtaa qeexitaanka Ake ee ku salaysan xasiloonida siyaasadda iyo tan baniga adduunkaba. Waa maaquul in ay markasta rabshado ka dhacaan Soomaaliya. Ciidammo hubaysan oo aan kuwa dawladda ahayn sida Al-Shabaab iyo kooxo maleeshiyaad ah ayaa uga sii daray xasilooni darrada Soomaliya. Xaaladda siyaasadeed ee dalka ayaa sidaas ugu suntan mid jaahwareersan. Guulwadaynta siyaasiyiinta ayaa laashay horumarinta hay'adaha iyo awooddii dawladdu ugu adeegi lahayd muwaadiniinteeda.

Kacdoonnada aan dawliga ahayn oo kali ahi, ma suuragaliyaan in la curyaamiyo haykalka siyaasadda. Dhinaca siyaasadda, laalushka ay bixiyaan garabka fulinta dowladdu oo caado noqday ayaa golaha shacabka ku qasbay in ay u fuliyaan rabitaanka golaha fulinta.[41] Tusaale ahaan, mudane ka tirsan golaha xildhibaannada aqalka hoose ayaa qaabkii xilka looga qaaday afhayeenkii hore ee golaha shacabka, Maxamed Cismaan Jawaari ku tilmaamay "afgambi," ay soo maleegeen garabka fulinta dowladdu.

*Xil ka qaadistii aan caadiga ahayn ee dhawaan lagu la kacay Xasan Cali Khayre, oo ahaa raysalwasaarihii ugu waqtiga dheeraa xukuumadda Farmaajo ayaa muujinaysa odoros la'aanta iyo xasillooni darrada siyaasadda Soomaaliya ee soo jireenka ah ee ka dhalatay dagaalkii sokeeye*

Cayrintii Jawaari, waxa ay muujisay in ay laanta fulintu rabitaankeeda ku muquunisay golaha shacabka. Xildhibaannadu waxa ay inta badan ku qaybsamaan dano siyaasadeed, oo waa ay u nugul yihiin in ay difaacaan sharciga, halkii laga ilaalin lahaa madaxbanaanida, wadajirka iyo waajibaadka shaqada xildhibaannada, waxa danahii qaranka laga horumariyey dano shaqsi, xilkina waxa uu noqday awrt ku kacsi, halkii ay ahayd in golaha shacabku noqdo hay'ad qaran oo madax bannaan.

Sidaas oo ay tahay, xildhibaannadu waxa ay la saftaan madaxweynaha kursiga ku fadhiya ama raysalwasaarihiisa, iyaga oo ka qayb qaata ficillada keenaya xasilooni darrada siyaasadeed. Dhinaca kale, loollanka awoodeed ee u dhexeeya madaxweynayaashii kala dambeeyay iyo raysalwasaarayaashooda ayaa inta badan curyaamiya waxqabadka laamaha fulinta. Xil ka qaadistii aan caadiga ahayn ee dhawaan lagu la kacay Xasan Cali Khayre, oo ahaa raysalwasaarihii ugu waqtiga dheeraa xukuumadda Farmaajo ayaa muujinaysa odoros la'aanta iyo xasillooni darrada siyaasadda Soomaaliya ee soo jireenka ah ee ka dhalatay dagaalkii sokeeye.

41 HIPS interview with a Senator, 4 November, 2020, Mogadishu.

Sida laga soo xigtay qof xog-ogaal ah, xildhibaannada Soomaaliya aad uma tixgaliyaan arrimaha miiska yimaadda, balse waxa ay diiradda saaraan kuwa ay ugu jiraan faa'iidooyinka dhaqaale ee degdegga ahi. Marka la soo koobo, habdhaqanka iyo siyaabaha ay daneeyayaasha siyaasaddu uga xammaalanayaan Soomaaliya, waa arrin caqabad weyn ku ah soo bixitaanka hay'ado shaqaynaya iyo dowlad wanaagga dhasha. Intaas waxaa sii dheer, Alex De Waal waxa uu tilmaamayaa nooca ay tahay xasilooni darrada siyaasadeed, jahawareerka dowladda iyo maamul xumada ka jirta Soomaaliya. Waxa uu leeyahay dowladnimada Soomaaliya waxa ay 'noqotay mashruuc farsamo', ku dhaqanka siyaasadduna waxa uu u muuqdaa, "Maxmiyad iyo maamul dhalad ah oo isku dhafan."[42]

Marka aynnu ka eegno dhinaca farsamada, waa mashruuc gaaban oo ay maalgaliyaan deeqbixiyeyaal, kuwaas oo aan ka turjumaynin dhisitaanka hay'ado dawladeed oo waaraya, halka ay maxmiyaddu ka qeexayso awood darrada siyaasiyiinta aan socodsiin karin arrimaha dalka iyada oo aanay gacan siinnin AMISOM iyo beesha caalamku. Waxaa la yaab leh, erayga hanjabaadda ah ama ficillada ka soo yeera beesha caalamka, waxaa loo arkaa in ay yihiin kuwo dhisaya xasiloonida siyaasadda waddan Geeska Afrika ah oo dhibaataysan.

Sababtu waxa weeye, daneeyayaasha siyaasadda Soomaaliya ayaa u muuqda in ay iskaashadaan marka ay beesha caalamku ugu hanjabto in ay qayb ka yihiin qaswadaayasha siyaasadda. Sida uu De Waal qabo, farqiga u dhexeeya xilligii gumeysiga iyo xaaladda siyaasadeed ee ay hadda Soomaaliya ku jirto waa in" furfurnaanta iyo firfircoonida dhaqaale ee shaqsigu leeyahay kobocday."

Si ka duwan fikradaha dowladnimo ee ku saleysan suuq-geynta xorta ah, madaxbannaanida ka jirta suuqa Soomaaliya ma aha natiijo ka dhalatay dawlad-wanaagga, balse waa miro ka dhashay fashilka dowladnimo.[43] Si looga soo guuro xaddidnaanta,nuglaanta iyo xasilooni darrada siyaasadda, oo loo gaaro '' nidaamka helitaanka adeegga furan '' ayaa ku dhaqanka siyaasadda hay'adaha dawladda looga dhigay kuwo aan qof u xidhnayn, si dawlad wanaagga loo horumarinayo. Waqooyiga waxa ka jirta waxa uu ku tilmaamay '' saddexda albaab ee furan:"

- Labeenta siyaasadda oo ku dhaqma sharciga
- Ururada sida joogtada ah uga hawlgala qaybaha bulshada iyo kuwa gaarka loo leeyahay
- Ka midaysnaanta xakamaynta rabshadaha

---

42 De Waal, A. (2015).The Real Politics of the Horn of Africa: Money, War and the Business of Power. Polity Press.
43 Little, P. (2003). Somalia: Economy without state. Indiana University Press.

In ay labeenta ku dhaqmaan sharciga, waxa ay muhiim u tahay dhexdhexaadinta danaha lagu muransan yahay, awood qeybsiga, wadaaggidda dheefkorka siyaasadda iyo qaabeynta is dhexgalka dadweynaha, iyada oo la yareynayo halista guulwadaynta siyaasadeed ee shaqsiga ah. Xaaladdan oo kale, muquuninta awoodeed ma laha shakhsiyaad siyaasadeed, balse waxa ay ka timaaddaa sharciga laftiisa, iyada oo abuuraysa jawi siyaasadeed oo uu ku samaado dawlad-wanaaggu.   Hay'adaha dowliga ah ee madaxa bannaani waxa ay yareeyaan xasilooni darrada siyaasadda, waxa aanay xoojiyaan sarreynta sharciga iyo caddaaladda. Si kale haddii loo dhigo, sharciyada rasmiga ahi ma waafaqaan danaha labeenta siyaasadda, waxa aanay noqonayaan kuwo aan waxtar lahayn haddii aanay jirin hay'addo ama ururo qasbaya in sharciga la fuliyo.

Si dowlad wanaagga loo horumariyo, waa in uu dastuurku ilaaliyaa dhex dhexaadnimada hay'adaha dowladda, oo uu ka difaacaa faragelinta siyaasadeed iyo madax bannaani la'aanta. Cutubka sagaalaad ee hay'adaha South Africa, oo ah ilaaliyaha dadweynaha iyo hanti dhowrka guud, ayaa tusaale u ah hay'adaha dastuurku ilaaliyo iyo kuwa madaxabannaan ee qaaradda Afrika.[44]

Taariikhda siyaasadeed ee dawladnimada casriga ah ayaa sheegaysa in guusha laga soo hooyo xakamaynta ciidanku ay tahay "xaaladaha ugu albaabada qalaafsan," maxaa yeelay sida uu dawladnimada u arko Douglass North waa "ururro isu tagay." Si kale haddii loo dhigo, haddii ay dawladdu ku guuldarraysato in uu xakameeyo awoodda ciidanku, waxa ay siineysaa maamul-hoosaadyada iyo kuwa aan dawliga ahayn, fursad ay ku bilaabaan rabshado, iyada oo fursad u siinaysa in ay siyaasiyiinta wax saluugsani sameystaan ururro hubaysan oo iyaga u gaar ah. Waxa sida tan looga jeedaa, xoojinta xukunka ciidanku waxa ay shuruud u tahay xasiloonida siyaasadda, waxa aanay hooyo u tahay dhammaan tilmaamayaasha dowlad-wanaagga.

*"Sida labeenta siyaasadda oo kale, cududda ciidan ee Soomaliya waa mid aad u kala daadsan, oo aan lahayn awood dhexe oo maamusha*

Sida labeenta siyaasadda oo kale, cududda ciidan ee Soomaliya waa mid aad u kala daadsan, oo aan lahayn awood dhexe oo maamusha. Dawladaha xubnaha ka ah faderaalku waxa ay leeyihiin ciidammo nabadgalyo oo u gaar ah. Sida oo kale shaqsiyaadka siyaasiyiinta ah, ganacsatada iyo ururrada samafalka ayaa leh ilaalooyin u gaar ah. Dalalka deeq bixiyeyaasha ah ayaa tababaray cutubyo askar ah, kuwaas oo aanay hawlgalladooda iyo shaqadooduba ka mid ahayn ciidamada joogtada ah ee qaranka, balse waxa ay qabtaan uun hawlgallo gaar ah.[45] Tusaale waxa u ah, ciidamada ay Maraykanka iyo Turkigu tababarka iyo dhaqaalaha siiyaan ee Danab iyo Harimacad- sida ay u kala horreeyaan.

44 Andrews, A. (2010). Good government means different things to different countries. https://onlinelibrary.wiley.com/doi/abs/10.1111/j.1468-0491.2009.01465.x
45 HIPS interview, 11 September, 2020, Mogadishu.

Ciidamada Danab dajintooda iyo hawlgalladoodu ma aha kuwo hoos taga amarka ciidamada qaranka Soomaaliya, balse waxa ay ka amar qaataan Taliska Maraykanka ee Afrika. Sarkaal ruug-caddaa ah, oo lagu waraystay daraasaddan, ayaa yiri, "shaqooyinka iyo hawlgallada ay ciidamada nabadgalyadu dalka ka qabtaan waa mid kala daadsan,[46] waana sababta aanu miro -dhal u lahayn dagaalka ay kula jiraan Al-shabaab. Baahinta kooxo hubeysan, oo aan lahayn talis dhexe iyo sharci qaran oo laga midaysan yahay sida loogu hawlgalayo ayaa saaxadda siyaasadda Soomaaliya ka dhigay mid nugul, oo aan xasiloonayn aadna u rabshad badan. In dawlad wanaag lagaga hadlo jawigan siyaasadeed, oo ay dawladnimadi noqotay ururro midoobay, oo jaahwareer dhaliyay waxa ay u muuqata arrin xaqiiqada aad uga fog. Sidaa darteed Soomaaliya waxa ay u muuqataa in ay masaafo dheer u jirto albaabbada laga galo xasiloonida siyaasadda iyo dowlad wanaaga.

## 6.3. Isla xisaabtan la'aanta

Haddii ay dowladnimadu tahay qaabka awoodda loo adeegsado, isla xisaabtankuna waa in awoodda hay'adaha dawladda lagu kormeero siyaasad, dhaqaale iyo hab-dhaqan bulsheed oo dawli ah. In bulshadu ka qeybqaadato dawladnimada iyo isla xisaabtanka ayay arrintani ku xiran tahay si "loo ogaado heerka ay fikradaha muwaadiniinta dalku ka taagan yihiin ka qaybgalka doorashada dawladdooda, iyo sida oo kale xorriyadda dareen cabbirka, xorriyadda isu imaatinka iyo xorriyadda warbaahinta." Sidani waa in la yiraahdo, awoodda ay muwaadiniintu ku kormeerayaan hoggaamiyeyaasha dadweynaha iyo siyaasiyiinta, waxa ay ka timaaddaa doorashooyinka, xorriyadda isu imaatinka iyo warbaahinta xorta ah. Soomaaliya, doorashadii ugu dambeysay ee hal qof iyo cod ahi waxa ay dhacday 1969.[47]

Marka aynnu ka hadlayno haykalka warbaahinta, sida ku xusan warbixinta Freedom House ee 2020, soo baxday "warbaahintu gebi ahaan ba xor ma aha. " 20-kii sano ee la soo dhaafay, in ka badan 60 saxafi oo Soomaali ah ayaa la dilay, sida ay sheegtay Guddiga Ilaalinta Suxufiyiintu.[48]

> *Hab-dhaqanka siyaasadda Soomaaliya ee ku salaysan nidaamka 4.5, ayaa fikirka guud ee muwaadiniinta ka leexinaya hilinka toosan ee dawladnimada*

Hab-dhaqanka siyaasadda Soomaaliya ee ku salaysan nidaamka 4.5, ayaa fikirka guud ee muwaadiniinta ka leexinaya hilinka toosan ee dawladnimada. Muwaadiniintu iyagaa gabay kaalintooda ku aaddan dalbashada ka qaybgalka siyaasadda iyo bixinta adeegga. Qof ka mid ah shaqaalaha dawladda oo daraasaddan lagu waraystay, ayaa sheegay in aanay dawladahii kala danbeeyey awood u lahayn yaraynta saboolnimada, kobcinta isdiiwaangalinta dugsiyada, iyo kor u qaadista hab-nololeedka bulshada Soomaaliyeed.

46 HIPS interview, 3 November, 2020, Mogadishu.
47 Somalia: Preserving the integrity of the election. http://www.heritageinstitute.org/wp- content/uploads/2020/11/Preserving-the-Integrity-of-the-Election.pdf
48 60 Journalist killed in Somalia.
https://cpj.org/data/killed/africa/somalia/?status=Killed&motiveConfirmed%5B%5D=Confirmed&type%5B%5D=Journalist&cc_fips%5B%5D=SO&start_year=2000&end_year=2020&group_by=location

Dawladda Soomaaliya ma aha hay'ad dadweyne. Waa se naadi gaar loo leeyahay. Tusaalaha dhabta ah ee muujinaya gaar u yeelashada, ayaa ah in aqoonsiyada dawladda lagu isticmaalo ku marista dariiqyada Muqdisho. Marka askari taagan jid gooyo ama albaabka laga galo xarumaha dowladda iyo hoteellada uu qof weydiiyo aqoonsigiisa, aqoonsigaas uu sheegayo ugama jeedo dukumanti qaran oo ay heli karaan dhammaan muwaadiniintu, sida aqoonsiga qaranka (National ID) iyo baasaboorka.

Taa beddelkeeda, askarigu waxa uu waydiinayaa aqoonsiga shaqaalaha dawladda. 4799 qof oo kaliya ayaa u shaqeeya dawladda faderaalka sida ku xusan barnaamijka dibuhabeynta shaqaalaha rayidka ah ee 2017-2018.[49] Dadka intiisa kale ma laha dariiqyo macquul ah oo ay ku galaan hay'adaha dowliga ah. Aqoonsi la'aanta ayaa sida oo kale keentay in ay suxufiyiintu fursad ay ku soo tebiyaan u wayaan shirarka jaraa'id ee madaxweynaha iyo wasiirrada, si ay shirka ugu wargeliyaan dadweynaha. Sida uu sheegayo wariye fadhigiisu yahay Muqdisho, waxa sii adkaatay in la soo tabiyo howlaha hay'adaha dowliga ah, taa badalkeedana waxa timi in dacaayado la faafiyo.[50]

> *“Soomaaliya, kama shaqeeyaan dhammaan jidadka ay bulshadu kaga qeybgasho dowladnimada iyo isla xisaabtanku toonna, waa sida uu sheegay mid ka mid ah shaqaalaha rayidka ah, “dadka Soomaaliyeed waxa ay dhibbaneyaal u yihiin nidaam dawladeed oo bilaa jiho ah” taas oo is hor taageysa isla xisaabtanka iyo sida oo kale ku lugyeeshada dawlad wanaagga*

Marka laga eego dhinaca isla xisaabtanka, awoodda jaangoysa go'aannada Soomaaliya, waa mid dhinac kaliya ka raran, ka qeybgalka dadweynahana waa la go'doomiyay, arrintan oo caqabad weyn ku ah curashada dowlad wanaagga iyo hay'daha shaqeeya ee dowliga ah. Xaaladdan oo kale, dhinac ka rar naantu waxa ay keenaysaa qaab dawlad xumo, waa haddii cawaaqib xumada ay soo maleegaan lagu taageero shakhsiyaadka siyaasiyiinta ah ee ka soo horjeedda danta guud.

Caadi ahaan, la xisaabtanka nidaamka dimuqraadiga dawliga ah, ayaa ka yimaadda saddex waddo oo isku xiran: siyaasiyiinta la soo doortay oo kormeera waxqabadka xafiisyada maamulka; muwaadiniinta oo tabashooyinkooda u bandhiga siyaasiyiinta, waa haddii ay shirkadaha bixiya adeegyada dowladu ay ku guuldareystaan in ay fuliyaan dalabkooda, iyo in laanta fulinta dowladdu u gudbiso shacabka iyo golaha baarlamaanka. Soomaaliya, kama shaqeeyaan dhammaan jidadka ay bulshadu kaga qeybgasho dowladnimada iyo isla xisaabtanku toonna, waa sida uu sheegay mid ka mid ah shaqaalaha rayidka ah, “dadka Soomaaliyeed waxa ay dhibbaneyaal u yihiin nidaam dawladeed oo bilaa jiho ah” taas oo is hor taageysa isla xisaabtanka iyo sida oo kale ku lugyeeshada dawlad wanaagga.

49 HIPS interview, 1 November, 2020.
50 HIPS interview, 3 November, 2020, Mogadishu.

## 6.4. Hufnaan yaraanta iyo baahsanaanta musuqmaasuqa

Sida laga soo xigtay, mid ka mid ah dadkii la waraystay hufnaan la'aanta iyo musuqmaasuqa, ayaa ah "laba isku mataanaysan." Meesha aan hufnaanta loo tixgalinnin aalad dhiirrigalisa dawlad wanaagga, musuqmaasuqa ayaa curyaamiya hay'adaha dawladda. Isku xirnaanta ka dhaxaysa labadan cabbir ee kala ah dawlad xumada iyo dawlad wanaaggu, waxa ay salka ku hayaan maqnaanshaha macluumaadka sida joogtada ah ugu habbboon in bulshada dhexdeeda iyo warbaahinta lagu faafiyo.

Hufnaanta waxa looga jeedaa, '' bixinta xog dhammaystiran, isku xiran, oo la isku halleyn karo, 'halka musuqmaasuqa lagu qeexay' ' in awoodda dawladda lagu fushado dano gaar ah."[51] In la helo xog la isku hallayn karaa waxa ay muhiim u tahay la dagaallanka musuqmaasuqa, waxa aanay abuurtaa hiraal rajo. Haddii xogaha dawladda la sireeyo, go'aanqaadasho bilaa odoros ah ayaa lagu jaahwareerayaa, ku takrifalka awoodda dawladduna waa uu faafayaa. Daahfurnaanta madasha siyaasaddu waxa ay dad badan ku dhiirrigalinaysaa in ay ka qaybqaataan dawlad wanaagga, taas oo waddada u xaaraysa in lala socdo tallaabooyinka ay qaadayaan hoggaanku. Soomaaliya, dadweynuhu lama socdaan hawl-maalmeedka hay'adaha dawladda, waxaana meesha ka maqan hufnaanta soo ururinta dakhliga iyo qarashaadka miisaaniyadda.

Siraynta xogaha iyo adeeg la'aanta hay'adaha dawladda ayaa bulshada ku abuuray in aanay danaynin nidaamka dawladda. Tusaale ahaan, goleyaasha wasiirrada iyo xildhibaannadu si todobaadle ah, bille ah ama sannad le ah uguma wargaliyaan dadweynaha xogaha ku saabsan waxqabadka hay'adaha dowladda ee ku aaddan xakamaynta musuqmaasuqa iyo maamul xumada. Isbiirsiga danayn la'aanta dawladda iyo helitaan la'aanta xogo lagu kalsoon yahay ayaa u muuqda in ay yihiin aabbaha musuqmaasuqa iyo dawlad xumada ka jirta Soomaaliya.

Sabina Schnell, oo ah borofaysar ku takhasustay maamulka dawladda, ayaa helitaanka xogta ku tilmaantay lafdhabarta hufnaanta, halkaas oo ay dowladdu ku abuurto fagaareyaal dadweynaha iyo warbaahintu ay kaga qaybqaataan talada iyo go'aannada geeddi-socodka siyaasadda dalka.[52] Fagaareyaashaasi waxa ay kor u qaadaan isdhexgalka dadweynaha iyo dawladda, iyada oo helitaanka iyo isu socodka xogtu u furan tahay jaangoynta siyaasadda, xog-ogaalaynta warbaahinta iyo bixinta adeegga, waana hab-dhaqan aan Soomaaliya ka jirin.Tayeynta xiriir ka ay muwaadiniinta, ururrada bulshada rayidka ah iyo warbaahintu, la leeyihiin dawladda si " loo ogaado waxyaabaha ka dhex socda dawladda."[53]

---

51 Myint, U. (2000). Corruption: Causes, consequences and cures.
https://www.unescap.org/sites/default/files/apdj-7-2-2-Myint.pdf
52 Schell, S. (2020). Transparency Assessment in National Systems, in Paanakker, H. Masters, A, & Huberts, L. Quality of Governance: Values & Violations. Palgrave Macmillan.
53 Schell, S. (2020). Transparency Assessment in National Systems, in Paanakker, H. Masters, A, & Huberts, L. Quality of Governance: Values & Violations. Palgrave Macmillan.

Inkasta oo ay aad u sii kordhayaan shabakadaha wararka, idaacadaha iyo muuqbaahiyeyaashu, warbaahinta Soomaalida iyo bulshada rayidka ah waxa ay maalin walba la kulmaan bahdilaad, hanjabaad, waxa aanay dhib kala kulmaan ogaanshaha waxqabadka dawladda.[54] Haddii nuxurka dawladda casriga ah ee Soomaaliya uu ku dhex anbaday caqabadaha guud ee siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho, doorka warbaahinta iyo bulshada rayidka ah "afhayeennada" shacabka oo leh saameyn xaddidan ayaa iyaguna dalbanaya hufnaanta iyo la dagaallanka musuqmaasuqa.[55]

Sida uu qabo Schnell, hufnaantu waa awoodda lagu ogaan karo waxa ay dowladdu qabanayso, halka qulqulka macluumaadku yahay xaqiiqo la'aanta iyo carqaladeynta iyo xog-ogaal la'aantuna waxa ay wiiqaysaa kalsoonida u dhaxeysa muwaadiniinta iyo hay'adaha dowliga ah, waxaana tusaale u ah dawlad xumada. Arrintan marka la fiiriyo, dowladdu waxa ay u dhaqmeysaa si masuuliyad darro ah, oo aan shacabka dan laga lahayn, taas oo caqabad ku ah in la helo dawlad wanaagsan.

Soomaaliya xaaladdeedu waxa ay ku habboontahay sifaha dawlad xumada. Saddexdii sano ilaa afartii sano ee ugu danbeeyay waxay ay dawladda Soomaaliya ballanqaadaysay doorasho qof iyo cod ah, iyada oo aan hirgalinnin haykalkii lagama maarmaanka u ahaa doorashada. Xubin ka tirsan golaha xildhibaannada oo lagu waraystay daraasaddan, ayaa ku tilmaamay in dawladdu ku adkaysato qabashada doorasho qof iyo cod ah arrin aan xaqiiqo ahayn oo ku salaysan xog la'aan badan.[56] Sida oo kale waxa bannaan kaalintii muwaadiniinta Soomaaliyeed ku lahaayeen la xisaabtanka siyaasadaha iyo waxqabadka dawladda.

> *Meelaha ay hoggaamiyeyaashu ka cabsanayaan kacdoon dadweyne ayaa hufnaanta la xoojiyaa, laakiin Soomaaliya waxa xaddidan ka qaybgalka dadweynaha, kuwaas oo leh dalab dawlad wanaag, mana jiraan qaabab sharciya oo lagu yaraynayo ku dhaqanka dawlad xumada.*

Alina Mungiu-Pippidi, oo ah xeeldheere siyaasadeed, una dhalatay dalka Roomaaniya, ayaa sheegtay "dalalka ugu dawladda wanaagsan dunidu, in dawlad wanaagga ay u soo mareen tobannaan sano iyo qarniyo badan oo dalab dadweyne, debuhabayn iyo dhabar adayg lagu soo geeddi-galiyey, si ay u soo gaaraan libinta ay maanta ku naaloonayaan, walina ay wax ka dhiman yihiin.[57]

Meelaha ay hoggaamiyeyaashu ka cabsanayaan kacdoon dadweyne ayaa hufnaanta la xoojiyaa, laakiin Soomaaliya waxa xaddidan ka qaybgalka dadweynaha, kuwaas oo leh dalab dawlad wanaag, mana jiraan qaabab sharciya oo lagu yaraynayo ku dhaqanka dawlad xumada. Sidaa awgeed, dalku waxa uu si aan kala go' lahayn ugu suntanaa in uu u qalmo mid ka mid ah dalalka ugu hufnaanta yar, uguna musuqmaasuqa badan adduunka, waana kaalin ay Soomaaliya gashay soddonkii sano ee la soo dhaafay. Haddii ay hirgalinta wawlad wanaaggu tahay hawl aan wali ka "dhammaan" dalalka dunida ugu dawladda wanaagsan, hannaankani si arradan ayaa uu uga bilaabmay Soomaaliya.

---

54 HIPS interview, 9 August, 2020, Mogadishu.
55 HIPS phone call interview, 20 Sep, 2020.
56 HIPS interview, 27 October, Mogadishu.
57 Audit of the financial statements of the federal Republic of Somalia for the financial year ended 31 December 2018. http://oag.gov.so/wp-content/uploads/2019/10/Audit-of-the-Financial-Statements-of-the-FGS-FYE- 2018-Copy.pdf

## 6.5. Musuqmaasuqa Baahsan

Inkasta oo horumar laga sameeyay maamulka dhaqaalaha sida diiwaangalinta faraha ciidamada nabadgalyada, si looga takhalluso waxa loo yaqaanno ciidamada caaglaha ah, wali musuqmaasuqu waa caqabadda ugu weyn ee hortaagan dawlad wanaagga Soomaaliya. Xataa shuruudihii ay Hay'adda Lacagta Adduunka iyo Bangiga Adduunku ay ku xireen cafinta daynta lagu leeyahay Soomaaliya uma muuqdaan in ay siyaasiyiinta ka hor joogsadeen maamul-xumada dhaqaalaha yar ee Soomaaliya.

Hanti dhowraha guud ee Soomaaliya, Maxamed M. Cali ayaa ku warbixiyay in ay wasiirradu diideen isticmaalka sanduuq-xisaabeed (account) oo midaysan, iyaga oo doortay hannaanka bangiyada ama furashada kayd-lacageedyo u gaar ah, oo loogu talagalay kaalmada horumarka. Warbixintiisii 2020, waxa uu Cali ku sheegay in ‘’ inta badan wasaaradaha, waaxaha iyo hay'adahii dabagalka lagu sameeyay, ay mid kastaaba qaadatay ugu yaraan laba qandaraas oo aan ka diiwaan gashanayn xafiiska hanti dhawrka guud.[58]

In kasta oo la diiwaangaliyey in dalku shantii sano ee ugu danbaysay ku tallaabsaday horumar kooban, haddana waxa ay darajada ugu hooseysa ka gashay daraasaddii ay Mo Ibraahin Foondheeshin 2020 ka samaysay dawladnimada Afrika. Kaalinta Soomaaliya waa ta ugu hooseysa qaaradda Afrika marka laga hadlayo la dagaallanka musuqmaasuqa, canshuuraha, abaabulka dakhliga, maareynta miisaaniyadda iyo maamulka maaliyadda adeegyada dadweynaha.[59]

Sida oo kale, hanti-dhowraha guud waxa uu ku sheegay warbixintii 2018-2019 in Midowga Yurub ‘’ ay siiyeen wasaaradda maaliyadda lacag dhan $ 17, 004, 816, balse $ 13, 266, 667 oo kaliya lagu shubay sanduuq-xisaabeedka maaliyadda dowladda federaalka. Sida oo kale, Sacuudi Carabiya, ayaa 31 December 2018 ku deeqay $ 20, 000,000, 'laakiin $ 6, 070, 868 oo kaliya ayaa xisaab xirka maaliyadda lagu muujiyey. Musuqmaasuqu waxa uu aad ugu dhex faafay dakhliga maxalliga ah ‘’ waxaana lacagtan lagu isticmaalaa goobaha lagu qaado, waligeedna laguma sheego xogaha xisaabaadka la wariyo.[60]

Marka laga yimaaddo, daahfurka eedeynta hanti-dhowrka guud ee ku saabsan maamul-xumada maaliyadda, Soomaaliya iyo gaar ahaan wasaaradda maaliyadda ayaa lagu ammaanay dardargelinta howlaha deyn cafinta, ballaarinta dakhliga gudaha iyo qaadashada heerka hufnaanta miisaaniyadda. Wasiirka maaliyadda, Dr. Cabdiraxmaan Bayle ayaa ku adkeystay in tirooyinka ku xusan shaxanka xisaabaadka warbixinta hanti-dhawrka guud in ay ka hor imanayso kuwa ku xusan xisaabaadka Bangiga Dhexe, waxa aanu tilmaamay in aanu xafiisku “arrintan kala tashan wasaaradda maaliyadda.”[61]

---

58 Audit of the financial statements of the federal Republic of Somalia for the financial year ended 31 December 2019. https://oag.gov.so/wp-content/uploads/2020/12/Consolidated-Compliance-Audit-Report-of-the-FGS- for-the-Year-Ended-31-December-2019.pd

59 2020 Ibrahim Index of African Governance-index report.https://mo.ibrahim.foundation/sites/default/files/2020-11/2020-index-report.pdf

60 Shaxson, N. (2007). Oil, corruption and the resource course. African Affairs, vol.83 (6).

61 Your figures don't add up, Beileh tells Auditor General. https://www.somaliland.com/news/featured- news/your-figures-dont-add-up-beileh-tells-auditor-general/

Sida laga soo xigtay wasaarada maaliyadda, warbixinta hanti-dhowrka guud 'may ahayn mid waafaqsan hannaanka dabagalka caalamiga ah.' Arrinta uu hanti-dhowraha guud ku sheegay in ay tahay musuqmaasuq bangi, sida uu sheegay wasiirka maaliyaddu "waxa jira kayd-xisaabeed bangi oo caalami ah, kaas oo ay dowladdu u isticmaasho lacagaha deeqbixiyeyaasha." [62] Xiriir ka ay Soomaaliya la leedahay dunida caalamka, waxa ay weli ku saameelan tahay aragtidii Jean-Francois Bayart ee furfurnaanta, taas oo siyaasiyiinta Afrika ay si aftahannimo leh oo farsameysan u buunbuuniyaan dibuhabeynta dowladnimada, iyaga oo" muuqaalka hay'adaha dawladda ka bixiya sawir aan gudahooda ka jirin, " waana hab-dhaqanka dawlad xumada.[63]

> Warbaahinta iyo bulshada rayidka ahi, waa in ay ka gudbaan helitaanka xogo dowladeed oo cayrin ah, kana dalbadaan xogo faahfaahsan oo sharraxaad leh, oo fasiraya sababaha ka danbeeya go'aannada ay gaaraan xukuumaddu

Marka laga yimaaddo, dawlad xumada baahsan iyo musuqmaasuqa, maxakamadda gobolka Banaadir waxa ay xukuntay afar sarkaal oo ka tirsan Wasaaradda Caafimaadka, ka dib markii ay musuqmaasuqeen lacagtii deeqda ahayd ee loogu talogalay Karoonaha bishii Ogosto ee sannadkan. Sida uu yiri, qof daraasaddan lagu waraystay, waxa wax laga xumaado ah in aanay jirin baaritaanno dhab ah ama dood baarlamaan oo lagu raadraacay kiisaskan. Waxa ay u egtahay in shacabka Soomaaliyeed laga la quustey in ay ku lug yeeshaan ficillada xukuumadda. Dhanka kale, maqnaashaha foolaad abaabulan oo wax ku biiriya arrintan ayaa sii hirgalinaysa labada dhibaato ee isku mataanaysan: waa musuqmaasuqa iyo hufnaan la'aanta'e.[64]

Haddii hufnaanta dalabkeedu yahay mid laba geesood ah, oo wax ku ool ah, marka loo eego hadalladii Schnell, xog xasayntu kuma filla la dagaallanka dhaqamada xunxun ee siyaasadda. Warbaahinta iyo bulshada rayidka ahi, waa in ay ka gudbaan helitaanka xogo dowladeed oo cayrin ah, kana dalbadaan xogo faahfaahsan oo sharraxaad leh, oo fasiraya sababaha ka danbeeya go'aannada ay gaaraan xukuumaddu.

Marka la eego, si kasta oo loo helo xogta dowladda ee cayrin, ma aha mid wargalinaysa dadweynaha. Tani waa halka ay bulshada rayidka ah ka haysato caqabadda ah in aanay la soconnin arrimaha dawladda iyo sharciyada iyada oo loo kala qaadayo macluumaadka cayrin kuwo dawweynaha loo sii faahfaahiyo. Dhinaca dowladda, waxa laga filayaa in ay abuurto meel ay kula hadlaan muwaadiniinta. Wadahadalkaas oo dadweynaha lagu wargaliyo siyaasadaha guud ee dowladda, adeegyada la bixiyo iyo go'aannada masiiriga ah.

Dhinaca kale, ka qeybgalka dadweynuhu, waxa uu kordhiyaa hilaadinta hab-dhaqanka dawladda, waxa aanu xaddidaa baaxadda musuqmaasuqa iyo gardarrada dawladda. Laakiin waxa ay dillaacdaa marka ay dadweynuhu hurdo dheer galaan, ee la waayo foolaad u halgamaya la dagaallanka musuqmaasuqa iyo hufnaan yaraanta-oo noqday laba xumaanood oo isku mataanaysan. Xumaantan isku lammaani waxa ay caqabad ku tahay in uu Soomaaliya ka hirgalo ku dhaqanka dawlad wanaaggu.

62 Federal government of Somalia: Office of the account general. https://mof.gov.so/sites/default/files/2020- 08/Quarter%20two%202020%20FGS%20FR%20%282%29.pdf
63 Bayart, J. (2000). Africa in the world: A history of extraversion. African Affairs, vol. 99 (217-267).
64 HIPS interview, 21 Sep, 2020.

## 6.6. Waxtarka Dowladda

> *Al-Shabaab wali waa khatar amni oo jirta, siyaasadduna waa mid faro isku taagtaag ah. Nidaamka awood qaybsiga 4.5 ma aha mid karti iyo aqoon toonna wax lagu xusho, waxaanu caqabad ku yahay tayada dawlad wanaagga*

Maammul ama dawladnimo marka laga hadlayo, sida dal u maareeyo baahiyaha muwaaddiniintiisa ayaa inta badan looga qiyaas qaadan karaa tayada waxqabad ee dawladdaas. Maarayntaasi waxa ay noqon kartaa noocyada kala duwan ee hawlaha dawladda, sida amniga, ilaalinta xuduudaha dalka iyo arrimaha siyaasadda iyo bulshada ka turjumaya. Arrimahaas marka la meelmariyo, ayaa ay abuurantaa bulsho ku xiran laamaha kala duwan ee dawladda. Dalka Soomaaliya, habacsanaanta iyo tabar yarida hay'adaha dawladda ayaa abuuray danayn la'aanta guud ee dawladda. Al-Shabaab wali waa khatar amni oo jirta, siyaasadduna waa mid faro isku taagtaag ah. Nidaamka awood qaybsiga 4.5 ma aha mid karti iyo aqoon toonna wax lagu xusho, waxaanu caqabad ku yahay tayada dawlad wanaagga. Marka la eego halbeegyada dawladnimada, tayada dawladda waxa lagu gartaa hadba sida adeegyada ay bixisaa yihiin iyo tayada siyaasadaha ay dajiso. Waxa kale oo muhiim ah fulinta, hufnaanta iyo sida ay dawladdaas uga go'antahay fulinta siyaasadaheeda."

> *Meelo badan oo Soomaaliya ka mid ah, gaar ahaan deegaannada Al-Shabaab gacanta ku hayso, adeegyada dawladdu waa mid kooban ama aan jirin*

Meelo badan oo Soomaaliya ka mid ah, gaar ahaan deegaannada Al-Shabaab gacanta ku hayso, adeegyada dawladdu waa mid kooban ama aan jirin.[65] Waxa aad u hooseeya hufnaanta dawladnimo iyo ka go'naanta hirgalinta siyaasad dimuqraaddi ah iyo waliba awooddii ay siyaasadahaas ku dajin lahayd, si ay u tayayso adeegyadii laga filayay.

Sidaas darteed, waxa meesha ka baxay kalsoonidii shacabku ku qabi lahayeen ha'yadaha dawladda. Caadiyan, tayada dawladnimo waxa xoojiya jiritaanka shaqaale rayid ah oo awood iyo madax bannaani leh. Sida uu qof xog-ogaal ahi sheegay, shaqaalaha xirfadda lehi, waa kuwa markasta jiheeya siyaasadda, kasbadana kalsoonida shacabka. nidaamka tamarta daran ee kumeelgaarka ah Soomaaliya kuma uu guulaysan in uu dhiso shaqaalahaas rayidka ah ee xirfadlayaasha ah.[66]

Habka doorasho guud oo qof iyo cod ah, oo shacabku doortaan baarlamaanka matalaya, iyaduna sida oo kale waa lagu guul darraystay. Hay'adaha dawliga ah ee heer faderaal, shacabka umay adeegin, kumana guulaysan in ay difaacan shacabka naftooda iyo maalkooda toonna, awoodda laamaha dawladduna waxa ay dhaafiwaayeen waxa dhawaan majallada Arrimaha Dibadda ugu yeertay "isbaarooyimka cabsida badan ee Muqdisho".[67] Saamaynta dawladda federalka ahi waxa ay ku egtahay, waxa uu xildhibaan aqalka sare ahi ku sheegay gaadmo siyaasadeed oo lagu beddelo hogaanka madaxda maamul goboleedyada, taas oo abuurta xasilooni darro cusub, hubanti la'aan iyo falalxumo nidaamka doorashooyinka ah, kuwaas oo daboolka ka qaada qalalaase maamul oo hor leh.Dawladaha xubnaha ka ah dawladda federalka , waxa ay iyaguna ku fashilmeen in sida tastuurku qabo awoodda u soo daadajiyaan shacabka.Waxaana ay awoodi la'yihiin in ay bixiyaan adeegyada asaasiga ah ee shacabku u baahanyahay.

---

65 Kaufmann, D. (2020). The worldwide governance indicators: Methodology and analytical issues. http://info.worldbank.org/governance/wgi/pdf/WGI.pdf
66 HIPS phone interview, 29 September, 2020.
67 Manson, K. (2020). Can one woman fix a failed state? https://foreignpolicy.com/2020/09/27/somali-army- corruption-hodan-osman-can-one-woman-fix-a-failed-state/

> *Saluuggaas guud ee dawladnimo, waxa uu difaac u noqday Al-Shabaab iyo masuuliyd darrooyinka siyaasadeed, waxa kale oo uu caqabad ku yahay in uu Soomaaliya dawlad wanaag ka hanaqaado*

Si la mid ah dawladda federalka ah, maamul goboleedyadu may hirgalinnin nidaam horu socod leh oo ay shacabku siyaasadda kaga qayb qaadanayaan, ama ay ku xiisaynayaan u adeegidda shacabka iyo abuuridda maamul tayo leh. Marka arrintaas loo eego, dawladaha tamarta yari wax horumar ah kama sameeyaan nolosha shacabkooda. Taaasi na waxa ay keentay in dadku ka niyad jabaan dalabka maamul tayo leh. Waxa dhulyaal ah dareenka ah in dawladdu shacabka u adeegto, maamulkuna noqdo mid wax ka tara baahiyaha guud ee dadka, fikirkaasna siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaan midna looma noolayn.[68] Saluuggaas guud ee dawladnimo, waxa uu difaac u noqday Al-Shabaab iyo masuuliyd darrooyinka siyaasadeed, waxa kale oo uu caqabad ku yahay in uu Soomaaliya dawlad wanaag ka hanaqaado.

Sida ku cad raadraacyada dawlad wanaagga, qaab-dhismeedka gudaha ee maamulka ayaa ah shayga ugu muhiimsan ee go'aamiya dawlad tayo leh. Tayo, markan waxa ay noqonaysaa in maamulku si wanaagsan u qabto hawlihii waajibaadku ka saarraa iyo in ay dadka hay'adaha dawladda ka tirsani u shaqeeyaan si adag oo hagaagsan. In hoggaamiyeyaasha iyo xubnaha ururrada dawliga ahi ku dadaalaan gaaridda hadafyada dawlad wanaagga lagu higsanayo.[69]

> *Kolka arrimahaas la eego, maamulka guud ee Soomaaliya waa mid aan u diyaarsanayn in uu dajiyo siyaasad cad oo maamul. Dastuurka iyo xeerarkii arrimahaas hagi la haana lama raaco*

Kolka arrimahaas la eego, maamulka guud ee Soomaaliya waa mid aan u diyaarsanayn in uu dajiyo siyaasad cad oo maamul. Dastuurka iyo xeerarkii arrimahaas hagi la haana lama raaco. Haddaba, awooddii ay hay'adaha dawladdu ku bixin lahaayeen adeeg caafimaad oo tayo leh, biyo nadiif ah iyo waxbarasho, kuna yarayn lahaayeen heerka shaqo la'aanta iyo fakhriga iyo wixii la mid ah saxaafaddu ma wariso, awoodaheeda dastuuriga ah na lagulama xisaabtamo. Qorshaynta, isku isku xirdhka, dabagalka iyo kormeeriddu waa ay ku yar yihiin hay'adaha dawladda. Sidaas darteed, sida uu sheegay qof shaqaale rayida ahi, dawladnimadii waxa ay noqotay wax dad gaar ahi isku naasnuujiyaan.

Waxaa kale oo aan la hirgalinnin, waxyaabaha asaaska u ah dastuurka iyo qaybintii awoodaha. Cawaaqibkuna waxa uu noqday in lagu fashilmo kala saaridda shaqaalaha rayidka iyo jaahwareerka siyaasadeed ee maalinlaha ah. Isdiidooyinka jira waxaa ka mid ah in baarlamaanka fadaraalku si joogta ah ay u carqaladeeyaan dedaallada dibadda ka imaanayay ee hormarinta dastuurka, sida ay dad badani u arkaan caqabad gudaha ah oo hortaagan isbeddel dastuurka lagu sameeyo iyo tayaynta dawladnimada.[70] Tusaale ahaan, bangiga adduunka ayaa soo jeediyay in dhammaan xilalka agaasimayaasha guud ee wasaaradaha loo soo xayaysiiyo si furan, lagu na shaqaaleeyo xirfad iyo karti, tallaabadaas waxa ku qancay, iskuna dayay in uu fuliyo raysalwasaarihii xilligaas Xasan Cali Khayrre.[71]

---

68 HIPS interview, 21 Sep, 2020.
69 Sanchez, A. (2013). Determinants of government effectiveness. file:///C:/Users/Envy14/Downloads/IJPAgovef-fectiveness%20(1).pdf
70 HIPS interview, 9 August, 2020.
71 HIPS interview, 9 August, 2020

*Nidaamka 4.5 waa caqabad ku hor gudban dawlad wanaagga Soomaaliya*

Xafiiska Raysalwasaare khayrre ayaa si cagojiid ah ku aqbalay codsiga bangiga adduunka, hayeeshee, baarlamaanka ayaa Khaayrre iyo dawladdiisii ugu hanjabay in ay kalsoonida kala noqonayaan, iyaga oo ku doodaya in dawladdu jabinayso habka 4.5 ee awood qaybsiga. Nidaamka 4.5 waa caqabad ku hor gudban dawlad wanaagga Soomaaliya. Baarlamaanku in nidaamkaas caddaaladda ah ee aqoonta ku dhisan agaasimayaasha lagu soo xulo waxa ay ku diideen in kuwo ay isku reero yihiin ku waayi karaan xilka agaasimenimo tartankaas furan. Waxa aanay masaaliixdooda shakhsiga ah ka doorbideen in ay ka hor mariyaan danta guud ee ah in la helo shaqaale rayid ah oo karti iyo aqoon leh.  Khayrre diyaar uma ahayn in uu xilkiisa ku waayo helidda dawlad wanaagga, qorshahaasna dawladda faderaalka ayaa halkaas ku xoortay, inkasta oo maamulka Jubbalaan ka gaaray guulo la taabankaro.[72]

Raadraacyada dawlad wanaaggu waxa ay dhiirragaliyeen muhiimadda in kor loo qaado tayada dawladnimo, iyada oo shacabka awoodda loo daadajinayo. Merilee Grinda oo ah bare sare oo horumarinta caalamiga ah iyo falaqaynta siyaasadda dajinta ku xeeldheer ayaa ku doodday in dawlad wanaaggu tahay awood saaridda gudaha iyo awoodda oo bulshada loo daadajiyo. Grindle waxa ay sheegtay in arrimaha oo sidan loo sameeyaa ay ku bilaabmaan in shacabka la siiyo awood dastuuri ah oo iyaga oo jooga deegaannadooda awood siinaysa. Dawladdu in ay gaarto deegaan kasta waxa kordhiya awoodda oo la baahiyo, la daaddajiyo ama awoodda oo la qaybiyo.[73]

Caddaymo laga helay isbarbar dhig lagu sameeyay waddamo faderaal ah ,sida Brazil, Mexico iyo South Africa ayaa muujiyay in muwaadiniintu heerarka dawladaha hoose ku firfircoonyihiin, una badanyihiin marka ay heerkaas joogaan in ay isla wadaagaan xogo, go;aanno gaaraan, kana doodaan astaynta khayraadka iyo dabagalka in fulaan siyaasadahaasi, taas ayaana ah midda kordhisa tayada dawladnimo.[74]

*Inkasta oo dastuurka dalku qeexayo in faderaalka Soomaaliya ka kooban tahay saddex heer-dawladeed oo kala sarreeya. Dawladda fadaraalka ah iyo dawladaha xubnaha ahiba ma ay qaadin tallaabooyin ay awoodda shacabka ugu daadajinayaan*

Xaqiiqdu waxa ay tahay, dastuurka oo isku dhexyaacsan iyo aawoodaha siyaasadeed oo aan aad u qeexnayn ayaa is hor taagay hanaqaadka dawlad Soomaaliyeed oo tayo leh. Inkasta oo dastuurka dalku qeexayo in faderaalka Soomaaliya ka kooban tahay saddex heer-dawladeed oo kala sarreeya. Dawladda fadaraalka ah iyo dawladaha xubnaha ahiba ma ay qaadin tallaabooyin ay awoodda shacabka ugu daadajinayaan. Heerka bulshada waxaa uun ka jirta qalfoofkii dawladnimo, waxaana maamula oo ku tagrifala wasaaradaha arrimaha gudaha ee heer fadaraal iyo mid maamul goboleed, kuwaas oo xaddida ka qaybgalkii bulshada ee dawladaha hoose.[75] Iyaga oo ku doodaya in awooddoodii la dhantaalay, ayaa wasaaradaha gudaha ee heer fadaraal iyo maamul gobolayd ba ka joojiyeen dadaal deeq bixiyayaashu wadeen oo ay ku doonayeen in ay si madaxbannaan ugu maalgaliyaan dhisidda dawladaha hoose ee dalka.[76]

72 HIPS interview, 20 Sep, 2020, Mogadishu.
73 Grindle, M. (2007). Going Local: decentralization, democratization and the promise of good governance. Princeton University Press.
74 Grindle, M. (2007). Going Local: decentralization, democratization and the promise of good governance. Princeton University Press.
75 Dysfunctional federalism: How political divisions, constitutional ambiguity and a unitary mind-set thwart power sharing in Somalia. http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2020/07/federalism.pdf 76HIPS interview, 29 Sep, 2020.

Waxaa la oran karaa hab-dhaqanka siyaasiyiinta iyo dabciyadooda iyo qaab-dhismeedka dawladnimada hadda jirtaa waxa ay lid ku tahay in dawlad wanaag uu ka hirgalo Soomaaliya.

Qof aan waraysannay ayaa yiri, iskudayga awoodda meel lagu soo aruurinayo ee dastuurka khilaafsani waa isbaaro masaaliix gaar ah laga leeyahay, taas oo hakinaysa helidda dawlad wanaagsan, shaqqaale rayid ah oo karti iyo aqoon leh iyo waliba soo noolaynta rajadii dadku ka qabeen in dawladdu cagaheeda isku taagto.[77]

Caddaymo laga soo xigtay cilmi baarisyo kala duwan ayaa muujiyay in nidaamayada dawladeed ee awooddoodu urursantahay ay ka saamayn yar yihiin nidaamka awoodahoodu baahsanyihiin, bulshaduna awoodda waxqabad leedahay, gaar ahaan dawladaha nugul, ee kalsoonida hay'adaha dawladda lagu qabaa aadka u hoosayso, sida Soomaaliya oo kale. Tusaale ahaan, daraasad uu sameeyay Machadka Daraasaadka Horumarinta ee dalka Filibiin(Philippine) ayaa qirtay in heerka dawladaha hoose ku fiicanyihiin ka jawaabidda baahiyaha, oo ay dhiirrigaliyaan dakhliga in la baahsho, hufnaanta iyo meelaynta baayiyaha bulshada kor loo qaado.[78]

Waxa iyaduna muhiimad leh sida Grindle qabto, dawladaha hoose waa meesha ay ku tababartaan hoggaanka heer deegaan, waxaana ka soo baxa maayarro caan ah iyo dibutaatiyada heer dagmo, kuwaas oo noqda kuwo siyaasadda saamayn ku yeesha, kordhiyana ka qayb qaadashada dawladda iyo maamul wanaagga.[79] Waana fursad dhallinyarada siyaasadda daneeya u ogolaanaysa in ay siyaasad ahaan u gudbaan heer qaran, kuwaas oo iyaguna bulshada deegaankooda ku sii dhiirragaliya in ay ka qayb qaataan siyaasadda qaranka.

> *Soomaaliya, haddaba waxa ay ku xannibantahay nidaam nugul oo ku meel gaar ah iyo dabaylo siyaasadeed oo aan la saadaalin karin, taas oo rajadii dawlad wanaagana sii shiiqinaysa*

Dalka Soomaaliya, rajadii laga qabay dhismaha dawlado hoose oo madaxbannaan waxaa hakiyay isbaaro siyaasadeedka ay dhigteen dawladda fadaraalka ah iyo kuwa dawlad-goboleedyadu. Carqaladaynta lagu sameeyay dhismaha dawladaha hoose, waxa ay horjoogsatay helidda dawlad tayo leh iyo tallaabooyinkii loo qaadi lahaa dhinaca horumarinta dawlad wanaagga. Soomaaliya, haddaba waxa ay ku xannibantahay nidaam nugul oo ku meel gaar ah iyo dabaylo siyaasadeed oo aan la saadaalin karin, taas oo rajadii dawlad wanaagana sii shiiqinaysa.

77 HIPS interview, 29 Sep, 2020.
78 Manasan, R. (1999). Indicators of good governance: Developing and index of good governance quality at the LGU level. file:///C:/Users/Envy14/Downloads/pidsdps9904%20(1).pdf
79 Grindle, M. (2007). Going Local: decentralization, democratization and the promise of good governance. Princeton University Press.

# 7. Gunaanad

Inkasta oo tobankii sano ee la soo dhaafay ay jireen tallaabooyin horay loo qaaday, haddana Soomaaliya wali waxa ay leedahay astaamaha dawlad fashilantay. Hay'adaha dawliga ah ee heer kastaa waa kuwo aan ku taagnayn cago adag, cabirkasta oo maamul wanaag waa mid liita. Sharciga iyo kala danbayntuna waxa ay noqdeen kuwo ay ku loollamayaan kooxo lid isku ahi. Arrimahaasi dawladnimadii waxa ay ka dhigeen mid aan la qiyaasi karin oo jaahwareer miiran ah. Hubanti la'aantaas iyo qalalaasaha siyaasadeed ayaa horjoogsaday in ay hay'adaha dawladdu taabbagal noqdaan, taas oo xaddiday tayadii dawladda iyo in maamulku fido.

Is afgaradka iyo isu tanaasulku waxa ay noqdeen kuwo laga inaabsaday, habka siyaasadda loo wajahaana waxa ay noqotay mid aan xeer xirin, taas oo dhalisay kala qaybsanaan baahsan, oo iyaduna caqabad ku sii noqotay hayaankii loogu jiray dawlad wanaagga. Intii lagu jiray ku meelgaarka nugul, gacan ka hadalkii siyaasiyiintu waxa uu isu beddelay wadashaqayn la'aan keentay in ay hay'adihii dawladdu hawlgab noqdaan. Arrintaasina waxa ay soo kordhisay hubanti la'aan iyo khatarta laga qabo in dib loogu noqdo qalalaase hor leh oo siyaasadeed.

> *"Isla xisaabtan iyo nuxurkii dawladeed ee ahaa in adeeg la gaarsiiyo bulshada, lana difaaco waa mid aan hanaqaadin*

Marka uu yimaaddo isla xisaabtanku, shacabku ma laha awood ay siyaasiyiinta ku saameeyaan ama kula xisaabtamaan kuwa xilalka u haya. Awoodda shacabka iyo ka qayb qaadashadoodu waa mid aan jirin. Dawladdiina waxa ay noqotay suuq siyaasadeed oo dhawr qof ku iibsadaan shakhsiyaad daacad u noqda. Si kale haddii loo dhigo, shacabka Soomaaliyeed saammi kuma laha nidaamka dawladeed ee aan cagaha badan ku taagnayn. Isla xisaabtan iyo nuxurkii dawladeed ee ahaa in adeeg la gaarsiiyo bulshada, lana difaaco waa mid aan hanaqaadin.

> *"Soomaaliya waxa ku mataanoobay dawlad xumo, musuqmaasuq iyo hufnaan la'aan ku timi hay'adaha dawliga ah iyo go'aannada siyaasadeed*

Baarlamaanka fadaraalku waxa uu lumiyay doorkii mataalaadda, iyo sumcaddoodii ahayd astaan xasilooni, iyo la xisaabtanka nidaamka bilawga ah ee tijaabada fadaraalnimada aan qeexnayn. Soomaaliya waxa ku mataanoobay dawlad xumo, musuqmaasuq iyo hufnaan la'aan ku timi hay'adaha dawliga ah iyo go'aannada siyaasadeed. Arrimahaas ayaa sii cakiray dawladnimadii waydda ahayd. Arrimahaasi waxa ay Soomaaliya dhaxalsiiyeen in ay noqoto dalka dunida ugu musuqmaasuqa badan, ugu na dhufnaanta yar, marka la eego xornimada saxaafadda iyo helidda war xaqiiqo ah oo dawladda ku saabsan. Isbaarada siyaasadeed ee aan sharciga waafaqsanayn ee ay dawladda fadaraalka iyo maamul goboleedyadu u dhigteen dhismaha dawlado hoose oo shaqaynaya ayaa iyana caqabad kale ah. Si kooban, Soomaaliya waxa ay wali ka fogtahay xayndaabka dawlad wanaagga, xaalkuna sidiisii ayaa uu sii ahaan doonaa ilaa jahada doonta siyaasadda laga beddelayo, dadkana laga soo qaybgalinayo.

# 8. Talobixin/tixgalin siyaasadeed

1. In la abuuro isdhexgal siyaasadeed oo u dhaxeeya hormuudka siyaasadda. Masuuliyadda dhammaan hay'adaha dawligaa in dastuurka lagu qeexo.

2. Waa in qorshaha xasilinta lagu daro tayeynta laamaha amniga, guud ahaanna siyaasadda laga dhex saaro.

3. Si loo kordhiyo isla xisaabtanka, dadkana loogu xiro dhismaha qaranka, waa in heerarka kala duwan ee dawladdu ay u hoggaansamaan dhagaysiga codka dadwaynaha. Shacab firfircoon iyo saxaafad xor ah.

4. Waa in dib loo soo celiyo sarreynta sharciga, iyada oo la dhisayo maxakamadda dastuuriga ah ama la abuurayo waddooyin kale oo lagu heshiiyey oo xallinaya khilaafaadka, si loo xakameeyo suuqa siyaasadeed iyada oo xayiraad sharci ah lagu soo rogayo saammileyda siyaasadeed een joogtada ahayn.

5. Si loo soo celiyo kalsoonida bulshada ee ku aaddan hay'adaha dawladda, garsoorku waa in uu ka tarjumaa taariikhda dhaqan-dhaqameed iyo midda diinta ee dadka Soomaaliyeed, iyada oo la is waafajinayo xukunka Islaamka iyo sharciga dhaqanka ee nidaamka sharciga dawladda.

6. Shaqaalaynta xafiisyada dawladda waa in lagu saleeyaa karti oo aan lagu salaynin nidaamka siyaasadeed ee 4.5, iyada oo la kala saarayo is-maandhaafka siyaasadeed ee manta jira iyo maamulka hay'adaha, si loo wanaajiyo waxtarka dowladda.

7. Si loo furo albaabka siyaasadeed ee ka qeybgalka bulshada, waa in la dhiirigaliyaa qaab-dhismeedka dowladnimada ee hoos laga soo bilaabayo, iyada oo la dhisayo dowladaha hoose, sida uu qabo dastuurku, taas oo ah madal bixisa beddelaad wax ku ool ah oo tababar hoggaamineed iyo wacyigelin bulshaba leh.

8. Si loo kordhiyo kalsoonida dadweynaha iyo ka qeybgalkooda hannaanka dowladnimo, waa in la qabtaa doorashada dowladaha hoose, dowlad faderaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah.

9. Si loo kordhiyo hufnaanta loona yareeyo musuqmaasuqa, dowladda faderaalka iyo dowlad gobaleedyadu waa in ay daabacaan xogta ku saabsan go'aannada dowladda iyo kharashaadka dowladda

10. Dowladda faderaalka iyo dowlad gobaleedyadu waa in ay abuuraan jawi saaxiibtinimo oo warbaahineed, si ay ugu saamaxdo baaritaanka dadweynaha iyo in ay u soo bandhigaan macluumaadka dadweynaha.

HERITAGE
INSTITUTE

Heritage Institute for Policy Studies